AASAASIGA FOREX



W/Q: ASAD GAACIYE

AASAASIGA FOREX



Asad Gaaciye waa qoraa dhawr buug oo kale oo ay ka mid yihiin Duurxul iyo dareen hadal, 33-da qodob ee furaha guusha ardayga iyo jawaabaha dugsiyada sare ee maaddada Af-soomaaliga iyo kan hadda ku hor yaal ee aasaasiga forex oo ah buuggii u horreeyey ee Af-soomaali ah oo barnaamijkaan ku saabsan. inkastoo aysan fududayn in buug la soo saaro oo la ebyo ilaa heer dhammaad bulshadana loo soo bandhigo, ujeeddada ugu weyn ee aan ka lahaa soo saarista buuggan ayaa ahayd in uu ka caawiyo bulshada soomaaliyeed ee ku soo badanaysa suuqaan in aysan dhib badan ka marin fahamkiisa. Buuggaani maaha mid ganacsi oo 100% waa bilaash, waxaana farxad iigu filan inaan caawiyo dadkayga oo aysan wajihin wixii aan ka maray anigu fahamka suuqaan.

Email: asadgaaciye@gmail.com

Asad Gaaciye

TUSMADA

Tusmada……...1
Hordhac……4
Afeef. ……..…6
Shuruudaha qofka laga rabo……8
CUTUBKA 1: WAA MAXAY FOREX? ……10
Waa maxay forex? ……11
Xilliyada ganacsiga……13
Xilliga suuqa London……15
Xilliga suuqa Newyork……..15
Xilliga suuqa Tokyo……..……16
Xilliga suuqa Sydney……17
Lacagaha……18
CUTUBKA 2: DULLAALKA……..……21
Dullaal……..…….22
Noocyada dullaalka……...23
Dullaalka DD……..…24
Dullaalka NDD……..…25
Straight through processing……..…26
ECN+STP……..……27
Xulasahda dullaalka……...……30
Iska ilaalinta dullaalka……...……33
Furashada koonto dullaal……...……34
CUTUBKA 3: PLATFORM…….……..…38
Platform……..…39
Meta trader 4…….…….…40
MT4-KA PC……..41
Market wacht…….……42
Window chart…….…...42

Terminal window……..……42
MT4-KA mobile-ka……..……44
Quotes……..…….45
Chart……..46
Trade…….…47
History…….……..47
News …….48
CUTUBKA 4: WEBSITE-YADA AAD U BAAHAN TAHAY
Website-yada aad u baahan tahay……..……50
Tradingview.com……...…50
Investing.com…….……52
Forexfactory.com……..……54
Forex.timezoneconverter.com……...……55
Finviz.com…….....56
CUTUBKA 5: EREY BIXINTA SUUQA……57
Buy ……..…….…58
Sell…….…59
Dalabyada aan la gaarin……59
Buy limit…….……...60
Sell limit……61
Buy stop…….…62
Sell stop……...…...64
Bullish …….…..65
Bearish……..….66
Candle……....66
Wick …….….68
Dogi…….…..69
Qasaare joojin…….…...70
Faaiido qaadasho…….……..74
Caabbi iyo taageere……78

Trendline……80
Bid & ask……...81
Leverage……82
Hanti iyo haraa……..…..84
Ribo……85
Qiimaha gelitaanka iyo ka bixitaanka……86
Server……86
Chart……..…88
Trade……..88
Quotes……...…….89
Xisaabinta PIP-ka……..89
Lot……90
CUTUBKA 6: FARSAMOOYINKA KA GANACSIG SUUQA
Fundamental analysis……..…92
Technical analysis……..97
Jabin iyo dib u tijaabin…….……106
Jabin been ah……108
Dib u noqosho…….…….110
CUTUBKA 7: TUSIYEYAAL……111
Tusiyeyaal……112
Moving average……...……113
Relative strength index……115
MACD……117
Fibonacci retracement……..118
CUTUBKA 8: DAREENKA NAFEEF IYO TALOOYIN
Dareenka nafeed……...……...121
Adeegyada cid kale kuu qaban karto……...…124
Tixraac…...……..126

HORDHAC

Marka hore Alle weyne ayaa mahad dhammaanteed leh ii suurageliyey inaan qormo aan dheerayn ka sameeyo barashada suuqa sarrifka ee online-ka ah, iyada oo aysan jirin buugaag kale oo Af-soomaali ku qoran oo maadadaan ka hadlay, taasoo sababtay in dadka Soomaaliyeed ee aan luuqadaha kale sida English-ka ku fiicnayni hawl adag ka maraan barashadiisa iyadoo markii horaba barashadiisu dhib badnayd.

Waxaan saadaalinayaa in dhiganahan yari uu kaalmayn doono dad badan oo uu u fududayn doono wixii ay dadkii hore ka mareen fahamka iyo barashada suuqaan. Walow aanan ku sii fogaanayn oo kaliya aan ku ekaan doono turxaan bixinta ereyada laga dhex adeegsado suuqaan iyo wax yaroo aan ka iftiimin doono labada nooc ee suuqaan looga ugaarsado sida farsamada iyo wararka (technical &fundamental analysis), oo aan filayo mar haddii qofku intaas ka barto isaga ayaa awood u yeelan doona in uu fahmo inta kale ee soo hartay oo ah dejinta istaraatiijiyadaha iyo wixii kale ee la halmaala suuqa.

Inta aan ka ogahay waayadaan ayey bilaabatay in Soomaalidu gaar ahaan kuwa Soomaaliya joogaa ay bartaan kana ganacsadaan suuqaan, taasina waa nasiib wanaag iyo horumar dadkeenu gaareen. Qofkii gurigiisa kula nabnaa yeelkiiye 2016 ayey bilaabatay in suuqaan dadku si fiican uga warhelaan xilligaasna ay bilaabatay halganka barashadiisa. Markii laga soo tago hawsha laga maray barashadiisa, waxaa iyana laf dhuun gashay ku noqotay dadka Soomaaliya jooga sidii ay ku heli lahaayeen dullaalley (brokers) aqbalaya dadka Soomaaliya degen. Intaa kaliya maahee waxaa iyana dhib aan yarayn noqotay sidii lagu heli lahaa bangi laga furan karo koontooyin caalami ah oo dullaalleydu toos lacagaha ugu diri karaan, iyana

nasiib wanaag waxaa goor dambe soo biiray bankiga Premeir bank oo bixiya kaararka caalamiga ah ee Mastercard. Helitaanka bankigaasi kaliya fursad uma noqon dadkii suuqaan danaynayey ee dantu ciishay se sidoo kale waxaa ku caana maalay dadyowgii kale ee ka xammaalan jirey online-ka sida degellada (websites) iyo kanaalada Youtube-ka oo awal ku xirnaa dadyow kale oo dibadaha iyo waddama aan burburin jooga.

Si ay noqotaba waxaa wax ilaahay loogu mahdiyo ah in aynu maanta u heli karno si dhib yar dullaalley, koontooyin caaalami ah iyo dad Soomaaliyeed oo tiro badan oo suuqaan wax ka garanaya kuna nool oo ka shaqaysta, haddii Alle raalli ka noqdana waxaan rajaynayaa in dhiganahaani uu qayb libaax ka qaadan doono fahamsiinta iyo ka dhisitaanka aasaaska dadka danaynaya barashada iyo ka shaqaysiga suuqaan.

Haddii aad si deggen oo qotodheer ku celcelina leh aad u akhrido buuggaan waxaa marag ma doonto noqon doonta inaad gaartay heer aad sii wadan karto barashada sarrifka qalaad oo aad markaas tahay qof iswadi kara oo ogaaday ugu yaraan meesha wax u socdaan.

Yaanan ka dulboodine waxaa sidoo kale jira kanaallo Youtube oo si hagar la’aan ah u horay dadaal iyo waqtiba oo in badan oo dadkeena ka mida caawiyey, iyagana kanaalladooda isha ha lagu hayo oo ha laga barto.

Haddii aad u hilhilatay/isu diyaarisay barashada iyo ka gungaaridda barashada suuqa sarrifka ee online-ka ah waxaad qaadday waddo aad ku gaari kartid il-maaliyadeed xooggan oo aad noloshaada kaga maarmi doontid inaad wax kale ka shaqaysid ama aad u ciillanaatid shaqooyinkii ciriiriga ahaa ha ahaato mid xirfad ama mid ganacsi kalaba e. si kastaba ha noqotee wax kasta oo dhammaadkoodu wanaagsan yahay waxaa

dhib badnaa bilowgooda oo waa sallaan adagoo haddaad ka gudubto aadan si sahlan ku soo dhacayn sidaa darteed dhabar adaygeeda lahaw.

AFEEF

Markii qoraal la samaynayo cidda samaynaysaana ay tahay Insaankii magacaas illowshaha loogu baxshay waxaa iska cad inay jiri doonaan waxuun ka maqan, ama khalad ah, ama ugu yaraan meel uun ka qalloocday. Iyadoo ay taasi mar walba dhacayso waxaan afeefanayaa in wixii iin ah ee aad buuggaan ku aragto aysan kas iyo maag iga ahayn ee ay tahay inaan ilduufay iyo inay si kale iiga hoos baxday, sidaas darteed qabashadeeda aad adigu leedahay si ku habboonna aad iigu soo wargelin doonto taasoo aan kaaga hayn doono abaal iyo xusuus intaba.

Waxaa intaas sii dheer buuggaani waa kii ugu horreeyey ee Af-Soomaali ku qoran ee FOREX laga qoray intaan ka ogahay sababtoo suuqaan ayaaba Soomaalida ku cusub. Iyadoo ay taasi jirto aniguna aan ku dadaalayey inaan Af-Soomaali rasmi ah ku qoro buugga ayaa waxaa halkaas ka dhashay hawl hor leh oo adkaynaysa iswaafajinta ereyada aan horay Afkeena ugu jirin iyo kuwa luuqadaha kale ee FOREX ku qoran yahay, taasoo aan filayo inay fududaan lahayd haddaan dugsiyadaan soo maray gaar ahaan kan sare aan Af-Soomaali ku qaadan lahaa hayeeshee aysan dhicin oo aan kuba liito xagga Af-Soomaaliga cilmiyeysan. Markaas waxaa iyana dhici doonto in ereyo dhawr ah oo waliba soo laalaaban doona ay Ingiriis ku qornaan doonaan, waxaana rajaynayaa maalintii la helo inaan ku soo cusboonaysiin doono.

Maadaama barashada maadaan ay u baahan tahay itus oo itaabsii (practical), waxaa aad ugu soo laalaaban doona sawirrada meelaha markaas laga hadlayo taasoo keenaysa inay buugga in badan oo kamid ahi sawirro qabsadaan. Hawsha ay sawirradu intaas ku darsadeen waxaa ka mida in bog wax ka bannaan yihiin inta sawirku qaadi waayo uu mid kale u tallaabo taasoo keenaysa in bogag badani hoos ka bannaanaadaan.

Markii la yiraahdo suuqa FOREX dadku hawl adag ayey ka maraan barashadeeda iyo ku shaqaysigeedaba waxaana ka mida in dadka ay jidka u galaan tuugo badan kuwaas oo oranaya inaga ayaa idiin shaqaynayna ee lacagta soo dira, oo ina ay dadku aaminaan lacagtooda u diraan waxyar ka dibna ayba arki waayaan oo laga dhuunto. Sidaas darteed waxaa iga afeef ah in laga digtoonaado oo aan cidna la aaminin hadii aysan ahayn cid la yaqaan oo la isku hallayn karo.

Jaantusyada lagu muujiyey isbedel qiimeedka qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan 100% u ekaan qiimaha ay u taagan yihiin, taasna waaba caadada FOREX oo isagaa isbedelkiisu badan yahay, marka taasna yaan lagu wareerin.

maadaama uu cilmiga barashada suuqa sarrifku uu aad u ballaaran yahay dhammaantiis kuma aanan wada qorin buugga oo kaliya waa in yar oo faham guud kaa siinaysa sida suuqu u shaqeeyo, sidaa darteed waxaa muhiim ah in qofka buuggaan akhristaa ay lagama maarmaan tahay in uu barashadiisa sii wato oo practical ku sii sameeyo oo uu booqdo muuqallada daadka ah ee sida bilaashka ah uga buuxa youtube-ka.

SHURUUDAHA QOFKA LAGA RABO

Qofku markii uu bilaabayo ka ganacsiga suuqaan waxaa looga baahan yahay dhawr qodob in uu la diyaarsan yahay ku waasoo kala ah:

1. In uu adeegsan karo qalab koronteedka casriga ah (mobile, laptop, Gmail, internet iwm): maadaama aynu nahay waddan asaaggi ka haray waxaa ay bulshadeenu u badan tahay kuwa aan adeegsan karin waxyaabaha aan kor ku xusay se mahad Alle hadda isbedel weyn baa dhacay 5tii sano ee u dambaysay waxaana kor u kacay ilbaxnimada iyo kacaanka aqooneed ee adeegsiga internetka bulshadeenu u leedahay oo haddii sannadkii 2000 safaf loo geli jirey si taleefoon loo dirsado hadda waad aragtaa sida ay tahay.
2. In uu barto: waa muhiim qofku in uu barto ugu yaraan sida suuqani u shaqeeyo.
3. Dullaal wanaagsan: xulashada dullaal wanaagsan sida sharci ahaan (legal documents), spread iyo in uu leeyahay koonto Islaameed.
4. Koonto banki oo caalami ah: bankigaagu waa in uu ku siin karaa xisaab banki oo si caalami ah wax loogu shubi karo loogana saari karo, sidoo kale waa in uu bankigaagu ku siiyaa Mastercard ama VISA card la aqoonsan yahay.
5. Baasaboor: markii aad furanaysid koonto bankiyeed caalami ah iyo waliba dullaalka waxaa ay kugu xiri doonaan baasaboor, marka waa lama huraan inaad samaysatid.
6. Waraaq caddayn deegaan (prove of residence): markii aad dullaalka furanaysid ayaa iyana lagugu xiri doonaa. Waraaqdaan waxaa bixiya bankiyada oo markaad koontada ka furatid ayaad iyana codsanaysaa.

Intaa dabadeed aniga oo rajaynaya inaad ka soo gudubtay oo aad tahay qof awood u leh in uu internetka iyo qalabka ku shaqeeyaba adeegsado waxaan u guda geli doonnaa fahamka suuqa sarrifka iyo barashadiisa, sidoo kale waxaan kuu rajaynayaa in inta aad barashadiisa waddid aad dhinaca kale ka waddid sii diyaarsiga dukumeentiyada kale ee aan xusay.

Intaas dabadeed aynu bilowno hayaankii barashada suuqa sarrifka.

CUTUBKA: 1
WAA MAXAY FOREX?

WAA MAXAY FOREX?



Si kooban forex waa suuq sarrif online ah kaas oo kuu ogolaanaya inaad lacag ku bedeshid lacag kale adiga oo adeegsanaya aaladdaada yar ee mobile-ka ama laptop-ka. Caadi ahaan forex waa erey loo soo gaabiyo foreign exchange oo uma gaar aha midka online-ka ah ee waa sarrif kaste, kanise waxaa uu ku gaar yahay online-nimada.

Suuqaani waxaa uu soo jirey boqollaal sano hayeeshee waxaa uu gaar u ahaa bankiyada waaweyn, shirkadaha iyo dawladaha. Dhawaan ayaa waxaa loo ogolaaday in ay dadka shacabka ahina soo galaan oo ay qayb ka noqdaan suuqaan baaxadda weyn leh, buuxiyaanna gobol yar oo lagu qiyaasi karo 20%. Celcelis ahaan xaddiga lacageed ee 24kii saacba la isku weydaarsado suuqaan waxaa uu yahay 5.3 Tirilyoon doollar (tirillion dollar) oo u kala wareega gacmo kala duwan. Waana taas midda aan doonayaa in

ay dadka Soomaaliyeed qayb yarna ha ahaatee ay wax ku yeeshaan oo kaga faa'iidaystaan.

Qaabka uu suuqaani u shaqeeyo waa in aad soo gadatid lacag marka qiimaheedu hooseeyo aadna iska gaddid marka qiimaheedu kor u kaco oo ay ka saramarto intii aad awal ku gadatay. Ama in aad lacag iska gaddo marka qiimaheedu sarreeyo oo aad soo gadato marka uu dhaco si aad isaga iibisid marka uu kaco.

Suuqaan waxaa lagu kala gataa waddan walba oo jira lacagtiisa oo iyada oo elektarooniko ah ayey ku jirtaa, waxaase ugu badan lacagaha lagu kala gato kuwa waddamada waaweyn oo xogtooda dhaqaale la hayo ama si fududba lagu heli karo maadaama marka aad rabtid inaad waddan lacagiisa iska gaddid ama aad soo gadatid aad u baahan tahay xogta dhaqaale ee waddankaas.

Waddanka lacagtiisa loogu ganacsiga badan yahay waa Maraykanka oo lacagtiisu kala bar ka badan tahay lacagaha kale ee suuqa yaalla wadartooda, sababtaasina waxaa keenaya dhawr qodob oo Maraykanku la gaar yahay sida:

1. Doollarku waa lacagta kaydka adduunka
2. Doollarku waa lacagta sarrifka ee xudduud walba laga aqbalo.
3. Maraykanku waa waddanka adduunka ugu ciidamo ku xoog badan
4. Maraykanku waa waddanka adduunka ugu dhaqaale adag.

Waxaa jira siyaalo kala duwan oo suuqaan ay ganacsatadiisu ugu shaqaystaan sida in ay ka ganacsadaan currency options, futures iyo spot forex market oo ah midda aan inagu u socono oo lagu bilaabi karo lacago yaryar.

Baaxadda suuqa sarrifku sidaan horay u soo tibaaxnay aad ayey u weyn tahay waxaana loo tixgeliyaa suuqa adduunka ugu weyn oo wuxuu boqol jeer in ka badan ku soo laabmayaa suuqa badeecadda ee Newyork.
Waxaa uu gaar la siiyahay suuqa sarrifku marka la barbardhigo suuqyada kale ee online-ka ah sida stocks, waxaa uu furan yahay 24 saac oo haddaad habeen barkii kacdid oo gashid iyo haddaad duhur dabadi u soo fariisatidba waad awooddaa. Waxaa kale oo uu gaar la yahay lacag kaste waad ku bilaabi kartaa xitaa haddii aad 100 dollar ku bilowdo wax waad kaga keeni kartaa 'leverage-ka' awgi. Haddii lacagtaadu yartahay waxaad heli kartaa 'lot' kasta oo akoonkaagu xamili karo sidoo kalana ma jirto cid saasa oo idiin dhaxaysa adiga iyo ka qaybqaatayaasha suuqa ee qiimaha jaangooya, waa bankiyada e.

Suuqa forex-ku maaha mid meel deggen oo xarun leh sida suuqyada kale ee waa suuq caalami ah oo computer-ro kala wadaan oo waxaaba loo yaqaan over the counter (OTC). Mana jirto cid si gaar ah ugu andacoon karta haba lagu kala awood roonaadee.

XILLIYADA GANACSDIGA (TRADING SESSIONS)

Lacag markii la yiraahdo maaha wax la cuno oo haddii aad malaayiin ka haysato oo aadan waxaad ku bedelato haysan afka saari kari maysid, waxaan uga socdaa lacagtu waa shay ha ahaato bir qaali ah sida dahabak iyo qalinka ama ha ahaato xaashi midab iyo cabbir gaar ah leh oo la daabacay ama ha ahaato tirooyin elektaroonik ah oo qalab lagu xareeyey e, mar

kasta waa wax bulsho ku heshiisay in lagu kala bedesho ashyaada kale ee qof haysto.
Waayadii hore ee aan lacagtu jirin dhib ayaa lagu qabay inaad hesho shayga aad u baahan tahay oo ilaa aad heshid qof waxaad haysatid u baahan adna aad wuxuu haysto u baahan tahay wax lama kala bedelan jirin. Waatii hormar la sameeyey oo Ayaan dambe lacagtu ahaan jirtey biraha qaaliga ah sida dahabka iyo qalinka. Waa damboo horay loo sii dhaqaaqay waa tii xaashiyo la daabacay la isula aqoonsaday in lacag ahaan loo isticmaalo maadaama birahaas qaaliga ahi ay gabaabsi yihiin oo cid nasiib badan ama dadaal badan ka martay mooyee aysan cid kale si fudud ku heli jirin. La sii ruqaansay oo waxaa la soo saaray kaarar tirooyin ku xaraysan yihiin oo lacagtii ka dhiganta. Adigu yaanan hadalka kugu badine waxaa la soo gaaray in jib yar ama ishaadaba aad lacagtaada ku qaadato sida furasireedka oo kale. Marka haddii ay sidaas tahay la yaab ma leh haddii la yiraahdo lacag ayaa online ku jirta oo laga shaqaysan karaa.
Ujeedadu waxay tahay lacagtu mar kasta waxay u baahan tahay wax lagu kala bedesho oo kaligeed ma shaqayn karto, afarta suuq ee aan soo wadnana waa afarta suuq ee badeecadaha ee lacagahaan socodsiiya. Afartaas suuq mararka ay furan yihiin ayaa ay lacagahaani socod leeyihiin oo laga faa'iidaystaa, socod leeyihiin waxaan uga jeedaa si aan inaga ganacsatada yaryar ah aan faa'iido u samayno waa in lacagtaani kacdaa si aan u gadano ama dhacdaa si aan isaga gadno. Marka maadaama ay suuqyadaan yihiin kuwa suuqaan sarrifka lacagaha dhaqaajiya waxaan eeganaynaa suuqyadu sida ay u kala fiican yihiin xaga dhaqaajinta iyo socodka lacagtaba, haddaba aynu mid-mid u faahfaahino afarta suuq ka dibna aan kala xulano midka ina anfacaya.afartaan suuq waxaa uu midba furan yahay qayb ka

mida 24-ka saac ee maalinta saacadahaas uu furan yahay ayaana la galaa.

XILLIGA SUUQA LONDON (LONDON SESSION)

Suuqa London waa suuqa ugu awoodda badan, ugu weyn, ugu socodsiinta badan lacagta, looguna jecel yahay. Waxaa uu ku yaallaa oo xarun u ah magaala madaxda ingiriiska ee London. Suuqaani waxaa uu furmaa (11:00 AM wuxuuna xirmaa 7:00 PM xilliga Soomaaliya ama GMT+3). Ama (8:00AM wuxuuna xirmaa 4:00PM xilliga Ingiriiska ama GMT+0).

Ganacsatadu badankeed waxaa ay sugtaa inta uu furmayo suuqaan oo reer yurub badankood suuqaan ayey ku xisaabtamaan maadaama ay xilligooda subaxnimo ka tahay. Suuqaan inta uu furan yahay lacagtu si fiican ayey jiho ugu socotaa oo *trend-kii* samaysmaa waa uu sii socdaa markaas ayaa ay ganacsatu gadataa haddii uu kor u samaysmo ama iska gaddaa haddii uu hoos u samaysmo.

XILLIGA SUUQA NEWYORK (NEWYORK SESSION)

Suuqaani waxaa uu ku yaallaa magaalada Newyork ee dalka Maraykanka. Waa suuqa awoodda labaad leh markii laga yimaado kan London waana suuqa ay soo galaan ganacsatada Maraykanku oo aanu wada ogsoonahay inay yihiin kuwa ugu dhaqaalaha iyo militariga ku xoogga badan adduunka, sidaas darteed saamayn weyn ayuu ku leeyahay suuqa sarrifka. Waa suuqa ay dhaqaaqa samayso lacagta Maraykanka oo ah kaydka lacagta adduunka oo sidoo kale ah lacagta lagu kala gato shidaalka iyo ganacsiyada waaweynba.

Xagga dhaqaaqa lacagaha suuqaan furnaanshihiisa door weyn ayey ka ciyaartaa oo suuqa si wanaagsan ayuu u dhaqaajiyaa.

Suuqaani waxaa uu furmaa (4:00 PM wuxuuna xirmaa 12:00 AM xilliga Soomaaliya ama GMT+3) ama (wuxuu furmaa 1:00 PM wuxuuna xirmaa 9:00 PM xilliga Ingiriiska ama GMT+0). Suuqaan waa midka ay soo galaan ganacsatada Maraykanku awoodda uu leeyahayna waa inaga ka soo sheekaynay. Sidii hore si la mid ah suuqaani waa uu dhaqaajiyaa sarrifka oo *trend*-kii samaysma waa uu socdaa sidii hore oo kale ayeyna yeelaan ganacsatadu oo haddii trend-kaasi kor u socdo way u raacaan haddii uu hoos u socdana way u raacaan. Xilliga suuqaani furan yahay waxaa habboon in awoodda la saaro lacagta Maraykanka lammaaneyaasheeda (USD PAIRS).

XILLIGA SUUQA TOKYO (TOKYO SESSION)

Xiligaan waxaa furma suuqa xaruntiisu tahay magaalo madaxda Jabaan ee Tokyo. Tokyo waa magaalada dhaqaalaha Aasiya sidaa darteed waxaa kaloo xilligaan loo yaqaanaa xilliga aasiya (Asian session). Waa xilliga leh awoodda saddexaad oo kaliya waxaa ka awood badan labadii tunka waaweynaa ee hore. Waa xilli ay dhaqaaq samayso lacagta Yen ee Jabaanka laga adeegsado waana xilli ay ku xisaabtamaan dadka Aasiya deggen.

Suuqaan waxaa uu furmaa (2:00 AM wuxuuna xirmaa 10:00AM xilliga Soomaaliya ama GMT+3) ama (11:00PM wuxuuna xirmaa 7:00AM xilliga Ingiriiska ama GMT+0).

Xagga dhaqaajinta lacagaha gaar ahaan lammaaneyaasha Yen suuqaani waa uu ku roon yahay se uma taag badna sidii labadii hore.

XILLIGA SUUQA SYDNEY (SYDNEY SESSION)

Suuqaan waxaa xarun u ah magaalada Sydney ee dalka Ustareelliya oo ah waddan dhaqaale adag haysta. Suuqaani waa kan ugu awoodda yar afarta suuqa ee aan saddex horay uga soo sheekaynay. Waa suuq aan wax saasa dhaqaajin dadkuna aysan ku xisaabtamin se kollay ka mida suuqyada afarta ah ee badeecadaha, sarrifkuna ku xisaabtamo. Xilliga suuqaani furan yahay waxaa awoodda la saaraa lammaaneyaasha lacagta Ustareelliya ee AUD-da.

Suuqaani waxaa uu furmaa (12:00 AM wuxuuna xirmaa 8:00 AM xilliga Soomaaliya ama GMT+3) ama wuxuu furmaa (9:00 PM wuxuuna xirmaa 5:00 AM xilliga Ingiriiska ama GMT+0) Haddii aad joogtid Soomaaliya waxaa habboon inaadan kan ku xisaabtamin sababa dhawr ah awadood; sida in uu furan yahay xilli hurdo oo saq dhexe ah aroor horana uu xirmo iyo in uu yahay suuq aan wax fiican dhaqaajin oo dadkuba aysan ku xisaabtamin.

Waxaa jira xilli aad loo jecel yahay oo suuqu si fiican u dhaqaaqo waxaana loogu yeeraa *isdhexgalka suuqyada* (market overlap). Waa xilli suuq furani suuq kale ku furmay oo labaduba wada furan yihiin. Waxaa jira laba isdhexgal suuqeed; waa mide waa marka ay isdhexgalaan suuqa London iyo Newyork waana 4:00PM ilaa 7:00PM xilliga Soomaaliya.

Saddexdaas saac ee ay isla socdaan ayaa aad loo jecel yahay dhaqaaqa suuqa awgii.

LACAGAHA

Lacagaha suuqaan ku jira ma tiro yara oo waddan walbaa sarrifka lacagtiisa ayaa ku jirta hayeeshee dullaaladu ma wada hayaan lacagahan oo dhan oo midba qaar ayuu hayaa.

Ma wanaagsana inaad lacag walba iska gadatid oo waxaa jira meelo laga eego sida in aad waddanka lacagtaas iska leh aad xog dhaqaaleed fiican ka haysid, inaad dabeecadda lacagtiisa baratid sida waxyaalaha kor u qaada iyo waxyaalaha hoos u dhigaba. Sidoo kale waddamada dhaqaalahoodu soo kobcayo sida Turkiga iyo Baraasiil oo kale waxaa aad u badan Spread-ka lacagahooda oo ma fiicna in laga ganacsado.

Halkaan waxaan ku soo koobaynaa lacagaha ugu mudan in laga ganacsado, magacyadooda, magacayada waddamadooda iyo qaabka loo qoraba.

Lacagaha aan soo wadnaa waa 8 lacagood oo ah kuwa ugu mudan xagga ka ganacsigoodu, sida spread-kooda oo yar iyo wadamadooda oo xog rasmi ah laga hayo maalin walbana warar dhaqaaleed fara badan laga soo saaro.

Waddamada lacagahoodu waxaa ay ka kooban yihiin saddex xaraf, saddexdaas xaraf labada hore waxaa laga soo gaabiyey waddanka lacagta leh magaciisa halka tan dambana laga soo gaabiyey lacagta magaceeda, oo haddii aad aragto USD waxaa laga soo gaabiyey US= unted states D= dollar. Markaas ayey isku noqonaysaa USD. Lacag walbana waa tabtaas oo saddexdaas xaraf ayey ka kooban tahay oo labada horana ay waddanka u taagan tahay kan dambana lacagta magaceeda.

Hoos waxaan ku soo qaadanaynaa shax ka kooban siddeedda waddan ee waaweyn ee lacagahoodu awoodda ku leeyihiin suuqaan ee sida wacana looga ganacsado, waxaana ay kala yihiin:

Tiro.	Lacagta	Waddanka	Laga soo gaabiyey
1.	EUR	Aagga yurub (euro zone)	Euro
2.	USD	Maraykan (United states)	United states dollar
3.	CAD	Kanada (Canada)	Canadian dollar
4.	GBP	Ingiriiska (great Britain)	Great Britain pound
5.	JPY	Jabaan (japan)	Japanese yen
6.	NZD	Niyuusiilaan (newzealand)	Newzealand dollar
7.	CHF	Iswiisarlaan (swizerland)	Swiss frank
8.	AUD	Ustaraaliya (australlia)	Australlian dollar

Haddii aan isla garanay in lacaguhu saddexdaas xaraf ka kooban yihiin waxaa inoo harsan sida la isugu lammaaneeyo. Mar haddii sarrif laga hadlayo waxaa lagama maarmaan ah in lacagaha labo-labo loo wada socodsiiyo oo waanu wada ognahay in aan hal lacag la gadi Karin. Sarrifku waa labo lacagood oo la isku gadayo, sidan oo kale:
EURUSD, EURGBP, GBPJPY, AUDCAD, USDJPY i.w.m.
Sidaas oo kale ayey dhammaantood labo-labo isugu lammaanyihiin oo markii aad mid gadatid tii kale ayaad iska gadday, markii aad mid iska gaddidna tii kale ayaad soo gadatay.
Tusaale; EURUSD ayaad gadatay, taas macneheedu waxaa weeye inaad EUR soo gadatay doollarna aad isk gaadday. Lidkuna waa lamid.
Lacagaha waxaa loo kala qaadaa labo nooc oo kala ah:

1. **Majors**: waa lacagta ay la socoto doollarku sida: EURUSD, USDCHF, GBPUSD iyo NZDUSD. Midig iyo bidix kay doonto ha ka xigtee waa lacagta ay doollarku la socoto.
2. **Crosses/minors**: waa lacagta aysan la socon doollarku sida: EURGBP, NZDEUR, iyo NZDCHF.

Markaa lacag walba waxay yeelan kartaa lammaaneyaal la socda, yacni iyada iyo mid kale. Markii aan rabno inaan tilmaano lammaaneyaasha lacag heblaayo doollarna aanan ka hadlayn waxaan oranaynaa “zzz crosses” sida Yen crosses oo laga wado lammaaneyaasha Yen sida GBPJPY, JPYNZD, CHFJPY.
Iyo tusaalaha kale ee Pound crosses sida GBPJPY, NZDGBP, CHFGBP.
Taas macneheedu waxaa weeye markii la yiraahdo zzz crosses waxaa laga hadlayaa lacagtaas la magacaabay lammaaneyaasheeda oo dhan. Sida aan kor ku soo xusnayna wixii doollar la socdo waxaa la yiraahdo Majors. Si kale waxaad ku arki kartaa in dhammaan lacagihii waaweynaa ee siddeedda ahaa ee aan kor ku soo taxnay loo yaqaan lacaga waaweyn ‘major currencies’.
Haddii aan niri lacaguhu waa lammaane isbaaro u dhaxayso sida ‘YYY/ZZZ’ labada lacagood midda hore waxaa la yiraahdaa **Base** tan damba **quote** ama **counter.** Tusaale; EURUSD, EUR waa Base USD waa Quote ama Counter.

CUTUBKA: 2
DULLAALKA (BROKER)

DULLAAL (BROKER)

Broker-ku waa dillaalka kuu fududaynaya inaad suuqaan gashid oo aad la ganacsatid bankiyada waaweyn adiga oo aan haysan lacag badan oo banki iska dhicin karta. Waa midka kuu fududaynaya inaad iibsatid xirmo badan oo lacag ah ama aad iska iibisid adoo akoonkaagu yaryahay oo habkaasna waxaa loogu yeeraa **margin trade** oo dayn ayuu ku siinayaa xoojinaysa lacagtaada. Sidoo kale waa meesha aad gelinayso dukumentiyadaada sidoo kalana ilaalinaya xogtaada suuqana kugu haynaya.

Qaabka ay u shaqeeyaan dullaaladu waa aad iyaga iska diiwaan gelisid, lacag ku shubatid akoonkaaga iyaga ka diiwaansan, dalab furtid, natiijo faa'iido ama qasaare ku xirtid dalabkaas, ka dibna ay natiijada akoonkaaga ka muuqato. Halkaas marka ay marayso waxaa kuu suuragal ah inaad bankigaaga ku xawilatid lacagta maalmo gudahoodna aad ku heshid.



Jaantuska sare waxaa uu inaga tusayaa sida ay dullaaladu ugu dhexeeyaan adiga iyo ka qaybqaatayaasha suuqa.
Adiga oo ah ganacsade (trader) waxaad furaysaa dalab (order) dullaalka (trading platform)[1] ka dibna toos ayaa laguugu gudbin doonaa ka qaybqaatayaasha suuqa (market participants)[2] oo markaas aad ku loolabi doontaan suuqa, dabcan markii aad dalab furtid waxaa lagaa soo horjeedinayaa dadka furay midka ka soo horjeeda dalabkaaga. Tusaalaha aan soo qaatay ee dullaalka suuqa tooska kuugu gudbinaya waa nooc ka mida dullaalada oo la yiraahdo NDD STP oo aan gadaal si faahfaahsan ugu sharxi doono.
Markaa dullaalka shaqadiisu waa in uu suuqa kugu xiro, xogtaada kaydiyo kuu sahlo inaad dalab dirsan kartid iskana xiri kartid ugu dambayna lacagtaada la bixi kartid.

NOOCYADA DULLAALADA (TYPES OF BROKERS)

Dullaalada guud ahaan waxaa loo kala qaadaa 2, waana:
1. Dealing desk brokers (DD)
2. No dealing desk brokers (NDD)

[1] Trading platform waa platform-ka uu dullaalku ku siinayo si aad ugu furtid, xirtid, adeegsatid qalabka saadaasha isbedel qiimeedka iwm.
[2] Ka qaybqaatayaasha suuqa marka laga reebo ganacsatada adiga oo kale ah ee suuqa geestooda kaga jira waxaa la yiraahda liquidity providers.



DULLAALKA DD (DEALING DESK BROKER)

Sida magaca ka muuqata dullaalka noocaan ahi isaga ayaa kula xaajoonaya oo meeshii la rabay in uu suuqa toos kuugu gudbiyo ayuu isagu kula ganacsanayaa. Waxaa kale oo loo yaqaanaa suuq sameeyeyaal (market makers)

Qaabka uu lacagta u sameeyo ee uu kuula ganacsanayo ayaa ah in uu markaad dalab gashid (buy ama sell) uu isna galo midka ka soo horjeeda si uu kuula tartamo. Mararka qaar waxaa uu kuu raadinayaa qof ku jira midka aad gashay kan soo horjeeda oo kaliya waxaa uuna kaa qaadanayaa khidmad yar oo uu spread-ka ku darsanayo laakiin marka uu kuu waayo qof kale ayuu qaadanayaa dalabkaaga kan ka soo horjeeda.



Order processing by Dealing Desk Broker

Sida ka muuqata sawirka sare marka aad dalab furtid ee aad adeegsanaysid ama marti u tahay dullaalka DD waxaa dalabkaaga loo gudbinayaa ganacsatada kale ee ku jirta dalabka kaa soo horjeeda oo markii aad guulaysatid iyaga ayey qasaaro ku tahay. Haddii kale waxaaba kula tartamaya isla isaga oo qaadanaya dalabka kaa soo horjeeda markii aad khasaartidna isaga ayey guul u tahay. Dullaalkan waxaa ay leeyihiin spread aan isbedelin (fixed spread).
Dullaalada noocaan dadku ma jecla sababtoo ah iyaga ayeyba la tartamayaan sidoo kale waxaa ay leeyihiin spread ka ballaaran kuwa kale oo qofka raba in uu PIPs yar qabto waxaa isugu darsama 2 waxyaaloo; iyada oo suuquba ku diidan yahay illeen dullaalka ayaa kaa soo horjeeda e iyo midda labaad oo ah weynaanta spreadkooda oo ilaa qimuuhu xoog isku bedelo aan dhaqaaqayn.

DULLAALKA NDD (NO DEALING DESK BROKERS)



Noocaan dullaalka ahi waxaa uu gabi ahaanba ka soo horjeedaa kii aan kor uga soo hadalnay ee DD, waa isagii oo maya 'NO' laga horumariyey. Sidii uu kii hore samaynayey si lid ku ah

ayuu markaad dalab qaadato waxaa uu toos kuugu gudbinaya macaamiisha kale ee suuqa oo dabcan iyagu ah kuwa caadi ahaan tatranku idinka dhexeeyo ama waxaaba uu toos kuugu gudbinayaa bankiyadii iyo ciyaaryahanadii kale ee suuqa oo qiimaha sida tooska ah iyagu u jaangoynayey. Waxaa meesha ka baxaysa tartankii aad kala kulmaysay DD.
Sida sawirka ka muuqata waxaa dullaalka NDD toos uu kuugu gudbinayaa ka qaybqaatayaasha.
Waxa kaliya oo uu lacagta ka sameeyo waa khidmad yar oo uu dalab walbaa goosto oo la yiraahdo commission.

Dullaalka NDD waxaa uu u sii kala qaybsamaa 2:

Dullaalka NDD waxaa loo sii kala jabiyaa labo nooc oo kala ah

1. Straight through processing (STP).
2. Electronic communication network + straight through processing (ECN +STP).

STRAIGHT THROUGH PROCESSING (STP)

Broker-da STP lagu magacaabo toos ayey macmiilka ugu gudbiyaan suuqa (liquidity providers) sidii DD-na ma qaataan lidkaaga kugumana saqajaamayaan.
NDD STP waxay leeyihiin liquidity providers badan oo uu mid walba bid/ask isagu samaysanaya markaa waxaad mararka qaarkood arkaysaa spread-yo kala duwan oo isku lacag ka muuqda. Waxaa intaas dheer in dullaalka laftiisu uu wax sii saarto oo tusaale haddii EURUSD liquidity provider-ku ku saleeyey 1.1200 waxaad platformka ku arkaysaa iyadoo ah 1.1201 oo uu ku darsado hal pip xilliga buy. Ama 1.1999 sell-ka.

STP waxaa uu ku soo koobmayaa in uu yahay dullaal suuqa uun kuu gudbinaya oo aan shaqo kale qabanaynin oo khidmadda uu helaa ay tahay commission yar oo uu kaa qaato dalab walba oo aad gashid.

ELECTRONIC COMMUNICATION NETWORK+STRAIGHT THROUGHT PROCESSING (ECN+STP)

Maadaama aan STP aragnay aan iftiimino ECN-ka. ECN-ku waa dullaal adeegsanaya computer isu kiin xiraya suuqa ama liquidity provider-ka oo u shaqaynaya si elektaroonik ah.
Waxaa dhacda mararka qaarkood inay bedelaan spread-ka oo ay yara kordhiyaan in yar waxayna dhacdaa kordhintaasi markii ay ka qaybqaatayaasha suuqu kordhiyaan.
Dullaalada ECN-ka ahi waxay u ogolaadaan macaamiishooda inay toos ugu xiraan ka qaybqaatayaasha kale ee ECN-ka ah. Ka qaybqaatayaashaasi waxay noqon karaan bankiyo, ganacsato yaryar, hedgers iyo dullaalo kale.
ECN-ku waxay u ogolaadaan macaamiishooda inay sidoo kale arkaan qiimaha rasmiga ah ee suuqa.
ECN waxay qaataan commission oo ay lacag ka sameeyaan.
Si aan si qotodheer ugu sii fahamno aan isbarbardhigno laba nooc ee dillaalada ah.



Ganacsade:



Markii uu ganacsaduhu diro dalab oo uu iibsado ama iska gado lacag sidoo kalana uu isticmaalaya dullaad DD ah waxaa la marsiinayaa gacan saddexaad oo hadda ku muujisan qolka saddexda fallaarood ku fiiqan yihiin ee dhinaca bidix eesawirka. Halkaas oo lagula macaamilayo ganacsadaha sida in laga go'aan gaaro in ganacsigiisa loo gudbiyo ganacsato kale si looga soo horjeediyo ama iyaguba ay la tartamaan.

Haddii uu ganacsadahaasi ahaa mid adeegsada NDD waxaa toos loogu xirayaa bankiyada iyo ganacsatada kale oo kaliya waxaa u dhexeeya xiriirka elektaroonikada ah.

Dullaalka DD:



Jaantuska sare ee isbarbardhigga labada jaad ee dullaaleyda ah, qolkaani waxaa uu u taagan yahay dullaal dealing desk ah. Oo sida ka muuqata waxaa uu heshiis ganacsi la galayaa ganacsatadii isaga oo aan si toos ah ugu gudbin suuqa, sida qolka korkiisa ka muuqatana waxaa gudihiisa ku jira dad kula macaamiilaya bankiyada ka sokow.

Dullaal NDD:



Sawirkaani waxaa uu uga taagan yahay jaantuskii sare dullaal no dealing desk ah. Sida ka muuqata isla sawirkii sare waa mashiin kaliya kugu xiraya suuqa oo uu qof walbaa si gaar ah fiilo xiriirisaa leeyahay.

Bankiyada:



Sawirkaani waxaa uu jaantuskii sare ku metelayaa bankiyada oo ah kuwa suuqan kala wada lacagihiisuna ku kaydsan yihiin.waana midka jaangooya qiimaha spread-ka (bid/ask).

Mar haddii aan isasoo barbardhignay midka aad dooranayso adiga ayey ku jirtaa oo kollay hadda ugu khatalmi maysid aqoon xumo kuu haysay.

XULASHADA DULLAALKA

Xulashada dullaal wanaagsani waa ay kugu adkaanaysaa markii aadan garanayn meelaha aad ka qiimayn doontid.
Maadaama meeshu suuq tahay oo la isku dhex jirana waxaa muhiim ah inaad kala xulato cidda ku anfacaysa sida aad u kala xulan lahayd alaabta kale ee suuqa taallaba. Halakan waxaan ku soo gudbinaynaa 6 arrimood oo muhiim ah markii aad xulanaysid dullaalkaa:

1. **Amniga (security):** Shayga ugu muhiimsan oo laga eego saxnaanshaha iyo isku hallaynta dullaalka waa amniga, waayo kumanaan dollar kuma aamini kartid qof sheegay kaliya in uu sharciyeysan yahay.

Maaha wax adag hubinta dullaalada dabcan mid walbaa waxaa uu leeyahay dukumentiyo sharciyeed (legal documents) oo halkaas ayaa laga eegaa cidda siisay shatiga sharcinimo. Waxaa jira hay'ado sharciyeeya dullaalada waxaana ugu muhiimsan kuwaan:

- United States: National Futures Association (NFA) and Commodity Futures Trading Commission (CFTC).
- United Kingdom: Financial Conduct Authority (FCA) and Prudential Regulation Authority (PRA).
- Australia: Australian Securities and Investment Commission (ASIC).
- Switzerland: Swiss Federal Banking Commission (SFBC).

▶ Germany: Bundesanstalt für Finanzdienstleistungsaufsicht (BaFIN).
▶ France: Autorité des Marchés Financiers (AMF).
▶ Canada: Investment Information Regulatory Organization of Canada (IIROC).

Hay'adahaas ayaa ugu muhiimsan kuwa sharciyeeya dullaalada haddii uusan intaas mid ka mida ka diiwaan gashaynayna ha ku degdegin.

Waxaa jira kuwo kale sida CyCEC. Sidoo kale waa suuragal in ay wadamo kale ka haystaan aqoonsiga iyo sharciga ganacsi.

2. **Qiimaha wax isdhaafsiga (transaction costs):** Qiimaha kugu baxaya markii aad trade furatid haddii uu yahay spread ama commission aad ayuu muhiim u yahay inaad ka eegtid dullaalka.

Broker-da qaarkood waxay qaataan commission badan xagga kuwa kalana ay ka yaryihiin, kuwa kale waxay leeyihiin spread weyn xagga kuwa kale ay ka yaryihiin.

Dabcan haddii aad tahay day trader pips yar ugaarsanaya kama bixi kartid spread badan marka waxaa mar kaste wanaagsan inaad dhinacaas ka eegtid.

Waxaa iyana muhiim ah in dullaalkaagu leeyahay koonto Islaameed (swap free account). Si lagaaga ilaasho ribada. Waxaan qodobkaas halkaan ugu daray akoonada aan kuwa Islaameed hayn waxaa laga qaadaa ribo, marka haddii aad koonto Islaameed qaadatid lacagaha lagaa qaado ayaa yaraanaya.

3. **Lacag dhigasho/la bixid (deposit/withdrawal):** Dullaaladu waxaa aad muhiim u ah in ay kuu fududeeyaan lacag dhigashada iyo la bixitaanka.

Xaq uma laha dullaaladu inay kugu dhibaan lacag la bixida waayo ujeedada kaliya ee aad ula joogto waa inay suuqa kugu xiraan ee lacagtaada kulama laha.
Waa in mar kasta oo aad dalbatid lacag la bixid aad la bixi kartaa sida ugu dhaqsaha badan.

4. **Platform:** Dullaalada badankood waxay isticmaalaan websityo u gaar ah oo platform ah marka waxaa muhiim ah in ay leeyihiin dhammaan qalabkii aad u baahnayd si aad usamaysid trade, ha ahaato qalabka saadaasha qiimaha ama orderku in uu yeelo markiiba si uu u furmo oo aan waqti kuu dhaafin.
Sidoo kale waxaa muhiim ah in uu warar ku siiyo si aad update u ahaato.

5. **Execution:** Waxaa iyana aad u muhiim ah in aysan waqti qaadan markii aad dalab (order) furtid oo isla markiiba uu kuu furmo. Dhibaatada ka imaan karta in uu kaa daaho ayaa ah in tusaale ahaan aad tahay scalper pips yar ugaarsanaya, ka warran haddii uu qiimuhu iska bedelo meeshii aad ku ogayd taasi waxay khaldaysaa nidaamkii aad ku tala galsanayd waxaana sabab u ah daahitaankaas.
Marka waa in brokerkaagu uu si degdeg ah u qaato orderka oo qiyaas ahaan ah ilbiriqsi la sii jajabiyey.

6. **Qancinta macaasmiisha (costumer service):**
Dullaalada qaarkood markaad isdiiwaan gelinaysid waa ay kula shaqaynayaan laakiin markii aad ganacsiga bilowdid waaba la waayaa oo waa cagajiid miiran. Marka waxaa muhiima in dullaalka mar kasta oo ay dhib jirto oo aad la xiriirto ay kuu soo jawaabayaan sida ugu dhaqsaha badan.

Qodobadaasi waxaa ay saldhig u yihiin doorashada dullaalka. Intaa waxaa sii dheer, waxaa iyana jira siyaalo kale oo lagu ogaan karo in dullaalkaasi fiican yahay iyo in kale sida in aad baartid oo weydiisid dad horay u soo isticmaalay oo aad qiimayso falcelinta ay ka sameeyaan, yacni in ay ammaanaan iyo in ay dareen xun ka muujiyaan.
Sidaa si la mida waxaa laga ogaan karaa fiicnaanshaha iyo xumaanshaha dullaalka fagaarayaasha lagu falanqeeyo dullaallada (forex broker's forum) halkaas oo lagu falanqeeyo mid walba oo iyaga ka mida ama ugu yaraan kuwa ugu caansan ee la yaqaan. Halkaasna waa lagu ogaan karaa in dullaalkaasi fiican yahay iyo in kale.

ISKA ILAALINTA DULLAALADA

Haddii ay dhacdo in dullaal ku khiyaamo waxaad qortaa oo diiwaan gashataa wixii dhacay iyo taariikhda, haddii kale screenshot ka qaad oo kaydi intaa dabadeed waxaad u dacwoon kartaa hay'adihii aan ku soo xusnay kor ee ay ka midka ahaayeen;
NFA, CFTC, FCA, PRA, ASIC, SFBC, BaFIN, AMF, IIROC.
Waxaa laga yaabaa inaad meelaha qaarkood ka akhriday in dullaalado yihiin tuugo dadka dhacda oo shaydaamo ah, laakiin dullaaladu waa isku jiraan badankoodna waa wanaagsan yihiin sidoo kalana waa ku mahadsan yihiin shaqada ay noo hayaan oo aanana la'aantood qabaneen. Waa sida dadka oo kale oo mid san iyo mid silloonba waa laga helaa.
Ka soo qaad inaad qasaare gashay oo akoonkaagu gubtay, soo ma ogid in iyaguba macmiil waayayaan oo suuqu ku yaraan

doono. Sidaas darteed iyagaaba kaa jecel inaad guulaysatid oo aad la sii joogtid.

FURASHADA KOONTO DULLAAL (BROKER ACCOUNT OPENING)

Markii aad soo kala fahamtay oo aad ogaatay waxyaalaha aad ku xulanayso dullaalka, waxaad go'aansatay inaad mid uun ka mida aad koonto ku yeelatid oo aad isku aamintid. Haddaba aynu wada eegno tallaabooyinka furashada koonto dullaaleed.

Ugu horrayn waa in ay kuu diyaarsan yihiin dukumentiyadii lagaaga baahnaa marka aad koonto jaadkaan ah furanaysid, dukumentiyadaasi waa baasaboor iyo waraaq caddayn deegaan ah. Baasaboorku waa hawl yaryahaye waxaa mararka qaar shiddo lagala kulmaa waraaqda caddaynta deegaanka gaar ahaan dadka Soomaaliya jooga oo aan lahayn tirsi guryeed iyo tilmaan midna (address and house number) taasoo uu Google-ku garanaayo. Sidaas darteed ayaa waxaan ku qasbanaanaynaa in aynu bankiyada gudaha weydiisano waraaq ay u dhan yihiin shuruudihii laga rabay. Haddii aan tilmaan ka bixino waraaqdaasi waa sidatan:

Astaanta shirkadda 

Cinwaanka

Warbixin kooban oo ku saabsan qofka koontada leh iyo ka Tirsanaanshihiisa shirkadda. Iyo sidoo kale in waraaqdaani caddayn U tahay isaga.

Tilmaanta qofka (address)
Magaca:
Tirada koontada (account number):
Taleefoon:

Mahad celin

Magaca qofka saxiixay waraaqda
Booska uu ka joogo shirkadda



Saxiix 

Waraaqda waxaa suuragal ah in dhawr jeer lagugu soo celceshay laakiin haddii intaas laga helo hadal maleh.goortii lagu soo aqbalana waa laguu soo sheegayaa oo akoonkaagu waxaa uu kuu soo qori doonaa (active, verified approved i.w.m.) Yaanan ka reebine waxaa jira dullaalo shuruuc fudud oo waraaqaha aan hadal galinayn laakiin taasi waxay astaan u tahay inay yihiin

kuwo jilicsan, badanaana waxaaba la xushaa kuwo sharcigoodu adag yahay sababtoo ah sharci ilaalintaas iyo adaygaasba waxay ina tusayaan inay jirto cid iyagana si adag ula xisaabtamaysa. Markii aad koontada furatay oo aad macluumaadkii lagaa rabay oo dhan galisay waxaa ku xigta inaad lacag dhigatid.
Intaadan lacagta dhigan waa inaad leedahay qaabkii caalamiga ahaa ee aad lacagta u dhigi lahayd oo ah Mastercard ama VISA card oo dabcan uu ku siiyey isla bankigii aad koontada ku lahayd ee waraaqdaan ka soo sheekaynay ku siiyey.

Markii aad gudaha u gashid koontadaada dullaalka ee aad dooratid lacag dhigashada waxaad ku buuxinaysaa macluumaadka kaarka ku dul qoran iyo cadadkii lacageed ee aad ku maalgashan lahayd suuqa.

Aan sii iftiinshee kaarka sidaan ayaad u gelinaysaa:
Credit card ***booska lacag bixinta dullaalka***



Kaarku wuxuu ka kooban yahay saddex xogood oo horay kaga qoran iyo hal xog oo gadaal kaga qoran. Saddexda horay kaga qoran waa tirada kaarka, magaca mulkiilaha kaarka iyo taariikhda dhicitaanka kaarka, midda gadaal kaga qoranna waa saddexda tiro ee hadda u taagan '123' ee sawirka sare looguna yeero card verification value, mid walbana waxaad u gelinaysaa sida ka muuqata sawirka sare ee fallaaruhu muujinayaan.
Markii aad intaas buuxisid ee aad 'deposit' tiraahdid lacagtu waa ay kuugu dhacaysaa si automatic ah waa haddii aysan wax kale kaa khaldanayne sida in lacag kuugu filani aysan kuugu jirin iyo in xogta kaarka ku dul qoran sida ay tahay aadan u gelin.
Credit card waa hab caalami ah oo lagacaha lagu diro laguna helo waxaana la soo saaray sannadkii 1950, shirkadaha ugu caansan ee kaararka noocaan ah bixiyaana waa Mastercard iyo VISA. Kuwa kalana waa ay jiraan. Kaararkaan markii lacagta lagala baxayo waxaa la isticmaalaa mashiino u gaar ah oo la yiraahdo ATM (automatic teller machine).
Markii aad inta faa'iido samayso ama yaadan samayn bee aad dullaal lacag kala baxaysid waxaa ay qaadataa muddo 24 saac ah hayeeshee koontadaada bankiga in ay kuugu soo dhacdo waxaa ay qaadanaysaa todobaad ama ka badanba.

CUTUBKA: 3 PLATFORM

PLATFORM

Mar haddii aad ka soo takhalustay dullaalka laga soo bilaabo xulashadiisa laguna keeno inaad ku qanacday oo aad lacagtaadii dhigatay, markaana aan eegno tallaabada xigta oo ah in dullaalku markii aad lacagta ku shubatay uu ku siiyey xogtii aad platform-ka ku geli lahayd (MT4 credentials). Dullaalada qaar waxay xogtaan ku siinayaan markii aad lacag ku shubatid ka dib, halka ay kuwo kalana ku siinayaan isla goorta aad koontada ka furatidba oo aad isla xogtaas ku gashid markii aad lacagta ku shubatid iyo ka horba.

Inagoo mar walba ka duuleyna hadba cidda muhiimada koowaad leh waxaan tusaaleheena platform-ka ku soo qaadan doonnaa platform-ka ugu caansan suuqaan ee MT4, kaas oo aan hor iyo dabo ka mari doonno si uu qof walbaa isagu u adeegsado oo uu isku filnaansho u dareemo markii uu suuqa dhex joogo. Platform-ku waxaa uu kaga duwan yahay dullaalka (broker-ka); dullaalku sida aan horay u soo iftiiminay waa meeshii suuqa kugu xiri lahayd, lacagta dhigan lahayd aadna kala bixi lahayd ugu dambayn. Halka platform-ku yahay meeshii aad falalka (buy&sell) ka oran lahayd. Ka sokow labadaas dalab ee (buy&sell) waxaa platform-ka ku dhex jira agabka qiimayaasha aan wali la gaarin (pending orders), kuwii saadaasha isbedel qiimeedka lagu gorfayn jirey (technical analysis tools), tusiyeyaashii (indicators) iyo barxaddii weynayd ee lagu muujin jirey garaafka isbedel qiimeedka (chart).

META TRADER 4 (MT4)



Meta trader 4 waa platformka ugu muhiimsan marka suuqaan platform-yadiisa laga hadlayo waxaana adeegsada ku dhawaad kala bar in ka badan dadka suuqaan ka shaqaysta.
Platform-kaan waxaa lagu isticmaali karaa noocyada borogaraamyada ee kala duwan (operating systems) sida window, android, ios iwm. Midkii aad wadatidba waad u helaysaa nooc uu ku shaqayn karo. Caadi ahaan dadku waxay ku adeegsadaan 3 shay midkoo ama saddexdaba laptop, tablet iyo mobile. Waxaana loo sii badan yahay kan hore iyo kan dambe oo tab-ka aad looguma badna, sidaas darteed labadaas ayaanu midba mar wax ka eegaynaa.



MT4-ka PC

Muuqaalka guud ee mt4-ka kambayuutarku waa sidaas waxaana loo qaybiyaa saddex waaxood oo waaweyn oo mid walbaa ay ku duugan yihiin macluumaad kale oo badan.

Saddexdaasi waxaa ay kala yihiin:





1. Market watch:
Waxaana ku guda jira dhammaan lacagaha iyo qiimayaashooda iyo waqtiyadaba, waana qaybta bidix ee ay ku qoran tahay 1.

2. Window chart:



Waana qaybta dhexe ee madow ee ay ku qoran tahay tirada 2. Waxaa ay ka kooban tahay isbedel taariikheedkii qiimaha, tusiyeyaashii iyo qalabkii kale ee muhiimka u ahaa ganacsigan.

3. Terminal window: qaybtaani waa qaybta hoose ee shaashadda kuna astaysan tirada 3 ee sawirka kore. Waxaa ay ku tusaysaa dalabyadaada hadday yihiin kuwa furan iyo kuwa la xirayba



Maadaama mt4-ka qaybtiisa computer-ka uu isticmaalkiisu fara badan yahay oo aanan qoraal lagala gaarin ama aanba aad loogu sii fahmayn markii laga soo tago qaybihiisa waaweyn ee aan xusnay, waxaan hoos dhigayaa link aad ka daawan karto taxane ku saabsan sida mt4-ka pc-ga loo isticmaalo oo dhammaystiran, waana kan: https://www.youtube.com/watch?v=9xSji5-EX4E&list=PL7_Y2OxpmtRt4yYtDZuoJHAp_oLlD6o-c&index=2
Ka dib markii aad si xiriir ah u daawatid muuqaalladaas waxaan rajaynayaa inaad si waafi ah u fahmi doontid.



MT4-KA MOBILE-KA

MT4-ka mobile-ku waxaa uu leeyahay sawirka sidaas ah. Si ka duwan kuwa computer-ka lagu shubo, kan mobile-ku ma laha shirkad u gaar ah oo dhammaan waxaa ku dhex jira dullaaladii iyo server-koodiiba. Oo haddii kuwa computer-ku dullaal walbaa leeyahay MT4 u gaar ah oo magaciisu ku qoran yahay kan mobile-ku magac gaar ah ma laha oo aan ka ahayn kii guud ee platform-ka (MT4). Markii aad u baahan tahay waxaad kala soo dageysaa playstore si automatic ah ayuuna kuugu soo qabanayaa nooca mobile-kaaga oo haddii uu android yahay mid ku shaqaynaya ayuu kuu soo dajinyaa haddii uu apple yahayna sidoo kale. MT4-ka mobile-ku waxaa uu ka kooban yahay dhawr qaybood oo midba shaqo u gooniya qabto waxaana ay kala yihiin:

QUOTES



Waa barta soo bandhigta taxda lacagaha ku jira koontadaada waana sida sawirka ka muuqata. Halkaani waxay u dhigantaa Market watch oo aan ku soo aragnay MT4-ka computer-ka.

Waa meesha aad uga soo daraysid kana tirtiraysid lacagaha waana kobta aad ka ogaanaysid isbedelka qiimaha sida bid/ask iyo spread-kuba inta uu marayo.Haddii aad lacag ku soo daraysid waxaad taabanaysaa meesha calaamadda ‘ku dar’ ay ka muuqato ee midigta sare, intaas ka dib waxaa kuu soo baxaya sanduuqyo ay gudihiisa ku jiraan lacago, macdano iyo wadaagyo (shares) shirkado kala duwan waadna ka doornaysaa midda aad u baahan tahay, markaad sidaas u dultaabatidna waxay ku soo darsamaysaa taxdii aad horay u haysatay ee meesha ugu hoosaysa ka fiiri.

Sidaas si lid ku ahna haddii aad rabto inaad lacag ka tirtirto waxaad taabanaysaa meesha qalinku ku sawiran yahay dabadeed waxaa kuu soo baxay meel aad tig saari kartid oo ku doorsan siinaysa midda aad damacsan tahay inaad tuurto ka dibna waxaad sii taabanaysaa calaamadda qashinka ee kuu muuqan doonta markaad qalinka taabatidba, wayna ka baxaysaa.

Haddii aad ka wahsato ama ishaadu qaban weydo magaca aad u baahnayd waxaad lammaanaha magaciisa ku qortaa meesha baaridda ee kore.

CHART



Waa barxad weyn oo ka kooban waxa ugu badan ee aaladdaani ka kooban tahay. Waa garaaf muujiya isbedel qiimeedka waana meesha ay ku jiraan qalabka saadaasha isbedel qiimeedka sida tusiyeyaasha (indicators) iyo qalabka dhismaha farsamada (technical analysis tools). Sidoo kale waxay ka kooban tahay tusiye qiimaha ah iyo mid waqtiga ah oo haddii aad fiirisid dhinaca midig ee taagga ah (Y axis) waxaad arkaysaa qiimaha haddii aad fiirisid dhinaca hoosana (X axis) waxaad arkaysaa xilliga. Markii aad furtid calaamadda ku darta ah ee bartama sare ka muuqata waxaad helaysaa qalabkii akhrin lahaa hadba qiime iyo waqti cayiman. Haddii aad *f* waxaad helaysaa tusiyeyaal fara badan sida RSI iyo MA kala duwan. Haddii aad saacadda taabatid waxaad helaysaa waqtiyadii kala duwanaa (time frames). Haddii aad taabatid baqshadda ku dartu ku sii dhex taal ee midigta sare waxaad

helaysaa kobtii aad dalabka ka dirsan lahayd “buy ama sell” iyo kuwii aan la gaarinba (pending orders) iyo sidoo kale xakamayntii khatarta sida qasaare joojin (QJ) stop loss (SL) iyo faa’iido qaadasho (FQ) take profit (TP).

TRADE



Halkaani waxay muujisaa dalabyada kuu furan oo markii aad furtidba waxaad ka arkaysaa qaybtan TRADE la baxday.

HISTORY



Qaybta taariikhdu waxay muujisaa dalabyadii la xiray faa’iido iyo qasaare kay doonaanba ha ahaadeene, lacag dhigashada iyo lacag la bixitaankaba.

Tusaale boggaani waxaa uu muujinayaa lacago badan oo la xiray oo kuwana faa’iido yihiin kuwana qasaare yihiin sidoo kale waxaa uu muujinayaa lacag lala baxay sida 50 dollar ay hortiisa balance ku qoran tahay. Lacaguhu waxay isugu jiraan laba midab; waa guduud/casaan iyo buluug.

Kuwa guduudka ahi waxay astaan u yihiin lacagaha qasaaray iyo kuwa lala baxay. Halka midabka buluugga ahi astaan u yahay lacagaha la faa'iiday iyo kuwa la dhigay.
Calaamad taariikheedka (calander sign) ka muuqda dhinaca midig ee sare waxay kuu ogolaanaysaa inaad dooratid taariikhda aad rabtid in laguu soo bandhigo sida hal maalin, todobaad, bil iyo mid aad adigu dooranaysid (tustom).



WARAR (NEWS)

Qaybtaan waxaa lagu soo qoraa wararka saamaynta leh ee suuqa. Sida kuwa dawladaha, shirkadaha iyo bankiyada. Ama si kalaba u dhigoo wararka ay soo saaraan ka qaybqaatayaasha suuqu.
Maadaama ay waxaani in faraha laga sameeyo (practical) u baahan yihiin waxaan halkaan dhigayaa link aad ka daawan karto intii aan ka soo sheekaynay oo toos ah.

https://www.youtube.com/watch?v=YQK3WTY_m3E&t=341s

CUTUBKA: 4
WEBSITE-YADA AAD U BAAHAN TAHAY

WEBSITE-YADA AAD U BAAHAN TAHAY

Markii aad rabtid inaad suuqaan ka ganacsatid waxaa jira dhawr website oo aad si joogto ah ugu baahan tahay lagama maarmaana kuu ah. Waxaan cinwaankaan ku soo gudbin doonaa dhawrkaas website ee aan is leeyahay kama maarantid. Waxaa laga yaabaa amaba jira kuwo kale oo u dhigma oo aad bedelkooda adeegsan kartid se kuwaan ayaaba kaaga filan.

TRADINGVIEW.COM



Tradingview.com waa website aad u heer sarreeya oo ay jecel yihiin dhammaan ganacsatada suuqa sarrifku. Waa website ay ku kulmaan malaayiin ganacsato ah oo xirfadlayaal u badan. Webkaani waa meesha lagu falanqeeyo isbedelka qiimaha soo socda oo qof walbaa waa u furan tahay aragtidiisa saadaalineed oo waxaaba uu leeyahay qayb dhan oo aragtiyaha ah. Webkaani

waaa meesha meesha ugu weyn ee lagu sameeyo dhismaha qiimaha ee farsamaysan. Wuxuu leeyahay qalab tiro badan oo aad ku dhisto qiimaha iyo garaaf qurux badan oo muujiya isbedel qiimeedkii la soo dhaafay. Mid walba oo ka mida alaabta looga ganacsado suuqa sarrifka waxaa uu webkaani u sameeyey naqshad dhan oo kaligiis dhinac walba looga eegayo haddii ay tahay warar, dhisme qiime, afkaarta dadka, tusiyeyaasha iwm. Markaad intaas oo dhan isku heshid waxaa si cad kuugu muuqanaya meesha shaygaan qiimihiisa loo wado, oo walow dadka aragtidoodu kala duwanaanayso misana waad ka dheehan kartaa meesha loo badan yahay. Webkaani wuxuu leeyahay adeegyo dheeri ah oo lacag ah badankoodse waa bilaash haddii aad lacag bixisana kaba sii wanaagsan oo waa laguu sii khidmaynayaa.



Sawirkaani waa webka tradingview.com garaafkiisa soo bandhiga isbedel qiimeedka oo muujinaya lammaanaha EURUSD oo qiimahoodu hoos u socdo. Faahfaahin dheeriya oo ku saabsan website-kaan waxaad ka daawan kartaa linkigan. https://www.youtube.com/watch?v=yRMgBFQxmFw

INVESTING.COM



Investing.com waa website kale oo aan ka dhicin kii hore ee tradingview.com. Waa web sidii kii hore oo kale kulmiya xogo fara badan oo ku saabsan suuqa sarrifka. Ha haato warar, saadaal, aragtiyo dadeed iyo qalab fara badan oo kaa caawinaya dhismaha qiimahabee investing ma yaraysto isna.
Shayga aadka cajiibka u ah ee aan lagu gaarin webkaani waa wararka muddaysan (economic calander). Webku wararkaan waxaa uu u qaabeeyey si cajiib ah oo uu ganacsaduhu si wacan uga faa'idaysan karo. Marka laga soo tago taariikhda iyo saacadda warku soo baxayo, waxaa uu u qaabeeyey qaab ka kooban saddex qaybood; war bixin dhaqaaleedka soo baxaya inta uu awal ahaa, inta laga filanayo iyo inta uu dhab ahaan

noqdo. Oo markaa wuxuu kuu sii sheegayaa in qiimaha soo bixi doona haddii uu ka bato inta laga filanayo ay lacag heblaayo waxaas ku dhici doonaan haddii ay ka yaraatana waxaas ku dhici doonaan. Markaas waxaabad meel ku sii qoranaysaa sida aad yeeli lahayd haddii ay sidaas dhacdo iyo wixii aad fali lahayd haddii ay sidaas si ka duwan dhacdo.

Xagga saamaynt wararka waxaa uu u kala shaandheeyey saddex waaxood; mid saamayntiisu yar tahay oo uu astaan uga dhigay hal madax , mid saamayntiisu dhexdhexaad tahay oo isna laba madax  siiyey iyo mid saamayntiisu ilaa xad saddex madax ku  badan tahay oo uu asteeyey.

Haddii uu kuu sheegay in haddii siddsi dhacdo jihahaas la aadayo iyo saamaynta uu yeelan karab waad taqaanaa waxa aad samayn doonto.

Muuqaal faahfaahsan oo ku saabsan adeegsiga webka investing.com halkaan ka daawo

https://www.youtube.com/watch?v=Rh6n9M84yuM

FOREXFACTORY.COM



Forexfactory.com waa web kale oo isna kaa caawin doona isbedel qiimeedka wararka ku saabsan. Waxaa uu sidii kii hore ee investin.com ku sheegayaa wararka soo bixi doona iyo heerka saamayntooda isagoo kuugu astaynaya baqshado midabadoodu kala duwan yihiin oo ay midda cas ugu awood badan tahay. Sidoo kale webkaan waxaad ka helaysaa suuqyada afarta ah ee stocks-ka la yiraahdo oo markaas arki karto xilligaas la joogo suuqa furan iyo saacadihiisa. Suuqayada waxaad ka arki kartaa dhinaca midig ee sare, marka hore hoos ayey yaallaan hayeeshee waad soo rari kartaa adigoo hadba gujinaya fallaarta kor u jeedda ee ka midka ah fallaaraha kor kaga sawiran daaqadda suuqyadu ku jiraan. Intaas kuma eka ee waxaad kaloo ka helaysaa xogo fara badan oo ku saabsan suuqa sarrifka iyo dad badan oo iyana suuqaan ku jira oo aad la xiriiri karto si aad isu gaashaan buursataan.

Halkaan ka daawo muuqaal ku saabsan webkaan oo sii faahfaahsan. https://www.youtube.com/watch?v=nCf770Dhopk

FOREX.TIMEZONECONVERTER.COM



Sida aan horay uga soo hadalnay waxaa jira afar suuq oo lagu xisaabtamo marka laga ganacsanayo suuqaan, afartaas suuq waxay leeyihiin xilliyo u gaar oo mid walbaa wuxuu leeyahay xillig uu furmo iyo xilli uu xirmo. Maadaama dadka suuqaan ku jiraa ay kala deegaan duwan yihiin oo ay ku kala nool yihiin carriyo kala fog waxaa isbedelaya waqti goduudkoodii (local time) waxaana suuragal ah in ay ku wareeraan marka suuqu furmayo xilliga ay iyaga ugu beegan tahay. Haddaba website-kan forex.timezoneconverter.com wuxuu fududaynayaa in waqtiga suuq hebel furmayo uu kuugu saleeyo waqti gudeedkaaga. Oo tusaale ahaan dadka Soomaaliya jooga waxay

taxda kore ee waddama iyo magaalooyinka ka dooranayaan magaalada Muqdisho sidaas ayeyna saacadaha tilmaaman ee suuqyadu ku noqonayaan xilliga Soomaaliya. Taasi waxay kaa reebaysaa inaad waqtiga ku wareedho iyo inaad bedesho hadba waqti waddan kale leeyahay.
Webkaan isagu faahfaahin dheeriya uma baahna oo waaba inta aan soo sheegnay inta loo adeegsado sidaa darteed waan ka maarmaynaa muuqaal ku saabsan adeegsigiisa.

FINVIZ.COM



Webkaani waxaa uu soo bandhigaa awoodaha lacagaha xilligaas la joogo, waa sida ay u kal itaal roon yihiin lacaguhu (currency strength). Tusaale ahaan markaad fiirisid shaxda hortaada ka muuqata waxaa si aan caad saarnayn kuugu muuqanaysa lacaguhu sida ay u kala xoog badan yihiin tusaale GBP iyo CAD. Haddii aad aragtay midda u xoog badan iyo tan u taag daran waxaa kuu fududaanaysa inaad gaddid ama gadatid.

CUTUBKA: 5

EREY BIXINTA SUUQA

BUY



Waa dalab (order) la adeegsado marka aad is leedahay suuqu kor ayuu aadi doonaa, ogow in ay tahay inta uusan aadin waayo haddii uu aado fursadaasi ku dhaaftay marka waxaa muhiim ah inaad dalabka dirtid inta uusan suuqu aadin kor laakiin aad haysatid cadaymo muujinaya in kor la aadi doono. Tusaale sawirka kor ka muuqda waxaa ay fursadda ugu fiican ee buy la oran karay banaanayd markii uu qiimuhu marayey 1.3555 ee ka korraysa farta buluugga ah ee 'buy' ku qoran tahay.
Waxaa jira ereyo kale oo la adeegsado booska buy waxaana ka mid ah 'long', 'high iyo 'bullish'

SELL



Waa dalabka la adeegsado marka aad isleedahay suuqu hoos ayuu aadi doona si lid ku ah tusaalihii hore ee 'buy'. Marka aad ku tuhmaysid in suuqu hoos aadi doono adigoo daliishanaya asbaab badan ayaad u diraysaa 'sell'. Asbaabahaas waxaa ka mida in uu caabbi (resistance) soo gaaray sida ka muuqata sawirka tusaalahan ee ku beegan qiimaha 0.8806 ee hoosta farta cas/guduudan ee 'sell'.

Waxaa jira ereyo kale oo la adeegsado booska sell waxaana ka mid ah 'short', 'low' iyo 'bearish'

DALABYADA AAN LA GAARIN (PENDING ORDERS)

Waxaa jira 4 jaad/nooc oo qiimayaal aan wali la gaarin ah waxaana la isku yiraahdaa 'pending orders) ama qiimayaasha la sugayo. Xusuusnow hadde wali la ma gaarine. Afartan qiime

waxaa loo adeegsadaa markii aad ku xisaabtamaysid in marka qiimuhu meel cayiman gaaro aad dalab gashid. Ha ahaado ‘buy’ ama ‘sell’ kuu doono e. taas macneheedu waxaa weeye markii meel hebla ama qiime hebel la gaaro ‘sell’ ama ‘buy’ ii dheh si automatic ah. Maadaama ay afartan ‘pending orders’-ka ahi hoos yimaadaan labadii kore ee tooska ahaa ee ‘buy’ iyo ‘sell’ sababaha kallifi kara inaad adeegsatid waxaa ay noqon karaan adiga oo mashquulsan oo aan shaashaada aaladdada fiirinteeda waqti badan u ahayn in marka qiimuhu halkaas gaaro si automatic ah laguugu furo.

BUY LIMIT: dalabka noocaan ah ee aan wali la gaarin waxa la adeegsadaa marka aad isleedahaya qiimuhu markii uu halkaas



gaaro (qiime cayiman) *awalna uu hoos u socday* sida sawirka kore ka muuqata waxaa ay ku habboon tahay in ‘buy’ la galo.

Sawirka kore ayaa inoogu filan tusaale oo qiimuhu hadda waxaa uu marayaa 0.8737 waxaana uu ka soo dhacay caabbiga kore ee 0.8806 oo mar ayuu tijaabiyey taageeraha (support) in uu mar labaad tijaabiyana waa ay u badan tahay oo isla marka uu tijaabiyaba kor loo qaado ilaa caabbiga kore ama meel ku dhaw laga geynayo. Sidaa darteed ka soo qaad inaad sugaysay in qiimuhu halkaas uu gaaro si aad 'buy' u gashid laakiin aad rabtid inaad mashquul gashid ama aad baxdid oo shaashadda ka hor tagtid amase aad ka cabsi qabtid in uu si kale oo degdeg ah kugu dhaafo, markaas oo kale waxaad platformkaaga ku xiranaysaa 'buy limit' si uu dalabka kuugu furo si automatic ah marka uu halkaas yimaado ama uu yimaado qiimaha aad la sugaysay ee 0.8717.

SELL LIMIT: Dalabkaani waxaa uu ka soo horjeedaa kii ka



horreeyey ee ‘buy limit’. Waxaa uu u shaqaynayaa sida lidka ku ah oo haddii aad kii hore soo fahamtay kanna waad haysaa. ‘Sell limit’ waa qiime aan la gaarin oo aad isleedahay aad gashid marka uu halkaas gaaro *isagoo awal kor u socday* rajaynaysidna in uu hoos u soo dhaco.Haddii aan ku salayno tusaalaha sawirka kore qiimuhu hadda waxa uu marayaa 1.14433 laakiin waxaan filaynaa in uu mar kale kor ku laabto oo uu soo tijaabiyo soona taabto caabbiga kore ee ah 1.14740 oo markaas dib loo soo celiyo ilaa laga keenayo taageeraha hoose ee 1.13555 sida ku muujisan fallaaraha. Sidaa darteed waxaad ku xiraysaa ‘sell limit’ platformkaaga si uu ‘sell order’ kuugu furo marka uu qiimuhu gaaro 1.14740 halkaas oo ah caabbig adag oo rajo fiican laga qabo in uu ka soo laaban doono qiimuhu.

BUY STOP: Dalabka noocaan ah ee ‘buy stop’ waxaa la adeegsadaa markii qiime markii aad filaysid in qiime awal kor u



socday uu sii socon doono oo uu sii wadan doono safarkiisii kor u socoshada ahaa. Sida ku cad sawirka kore qiimuhu hadda waxaa uu joogaa caabbi qiimihiisu yahay 1.26957 waxaase

suuragal ah in uu jabiyo oo inta uu cuskado sii dhaafo. Maadaama ay sidoo kale suurtowdo in uu soo noqdo oo uu suuqu hoos u soo dhaco ma galayno hadda oo ‘buy’ iyo ‘sell’ toona oran mayno laakiin waxaan sugaynaa inta uu qiimuhu is caddaynayo oo uu kor iyo hoos middood aadayo. Sidoo kale ma haysano waqti aan ku daawano inta uu qiimuhu is caddaynayo amase waxaan ka cabsi qabnaa in uu si degdeg ah ku gaaro ianga oo ka maqan shaashadda aaladda aynu isticmaalayno, sidaa darteed waxaan adeegsanaynaa ‘buy stop’ oo aan ku xiranayno qiimaha ku muujisan xarriiqda buluugga ee ay farta buluugga ah ‘buy stop’ ku dul qoran ahay qiimeheeduna yahay 1.27126. sababta aan ugu xirayno waxay tahay qiimuhu haddii uu jabiyo caabbiga ku muujisan xarriiqda madow ee 1.26957 waxaan ka filanaynaa in la sii wadi doono kor u kicitaanka sidaas Ayaan ugu xiranaynaa ‘buy stop’ si uu ‘buy’ automatic ah isugu furo markii uu qiimuhu halkaas marayo. Qiimaha aan gelinayno platformkeena waxaa uu noqonayaa mid xoogaa ka korreeya caabbiga sida kan ku muujisan xarriiqda buluugga ah ee 1.27126.

SELL STOP:



Sell stop waxaa la adeegsadaa marka aad rajaynayso in uu *qiime hoos loo waday* sii socdo oo la sii wado dhicitaanka. Sida ka muuqata sawirka kore qiimuhu hadda waxaa uu joogaa taageeraha weyn ee 0.78747 marka maadaama uu halkaas joogo laba shayba waa suuragal; in la celiyo oo uu dhaafi waayo taageerahaas, ama in uu jabsado oo uu sii wado dhicitaankiisa. Marka sidii aan horay u soo sheegnay waxaa suurawda in aynu sugayno waxa qiimuhu uu sameeyo laakiin aanan sugi Karin inta uu is caddaynayo sidaa darteed haddii aan aad u tuhunsannahay in uu jabsado si aysan fursadaasi inoo dhaafin waxaan ku xiranaynaa ‘sell stop’ si markii uu jabiyaba uu inoogu furo ‘sell’ si automatic ah. Qiimaha aan ku xirayno mt4ka ama platformkii aad isticmaalayso hadba waxaa uu noqonayaa meel xoogaa ka hoosaysa taageeraha sida kan ku muujisan 0.78688.



BULLISH: ereygu waa ‘bull’ oo ah ‘dibi’ micnaha uu halakan ugu jirana waa ‘buy’ oo dibibigu qaarka hore ayuu u weyn yahay madaxiisuna kor ayuu u taagan yahay marka caadi loo fiiriyo ama uu ku jiro xaaladdiisa caadiga haddii uusan isagu kas hoos u fiirin. Marka loo qoro ‘bullish’ waxaa laga dhigay sifo oo micnuhu waa ‘waa dibiyeysan yahay’ ama sifo dibi ayuu leeyahay. Ereygan waxaa la adeegsadaa marka la rabo in la yiraahdo suuqu waa ‘buy’ ayaa meeshii ‘buy’ la oran lahaa lagu bedelaa ‘bullish’ marka waa isku mid haddaad maqasho ‘buy’ iyo haddaan maqasho ‘bullish’



BEARISH

ereygu waa ‘bear’ oo ah xayawaanka la yiraahdo ‘madaxkuti’ abuur ahaan hoos ayey u foorartaa sidaas ayaa loogu magacdaray ‘sell’ oo ah markii uu suuqu hoos aadayo. Sidaa darteed ‘bearish’ waa ‘sell’ oo haddii bearish la yiraahdo iyo haddii sell la yiraahdo waa isku mid. Bearish-na waa bear oo sifo laga dhigay naxwe ahaan, waxayna noqonaysaa suuqu waa ‘madaxkutiyeysan yahay’ yacni hoos ayaa loo wadaa.

CANDLE



Ula-shamaceedyada jabaanku (Japanese candlesticks) waxay ka mid yihiin kuwa ugu caansan ee loo adeegsado shaxda muujinta

isbedel qiimeedka lacagaha iyo dhammaanba alaabaha kala duwan ee lagaga ganacsado suuqan sida forex, indices, stocks, binery iwm.
Taariikh ahaan waxaa adeegsan jirey jabaankii hore si ay wax ugu cabirtaan boqolaal sano ka hor waxaana la sheegaa in ay ku cabiran jireen qiimaha badeecada caadiga ah iyadoo aysan jirin internet iyo wax u dhaw toona. Waagii dambe oo ay suuqyadan online ah bilaabmeen ayaa loo adeegsaday xagga cabiraadda isbedelka qiimaha kaligeedna maaha laakiin waa loogu jecel yahay qayaasteeda iyo heli-ogitaankeeda odoroska isbedelka dhici doona awgeed. Badanaa hal ul-shamac macne weyn ma samayso se markii la isku rakibo dhawr xabbo ayey sameeyaan jiho kor ama hoos ah.
Ul-shamaceedku waxay ka kooban tahay labo qaybood oo kala ah jirka runta ah (real body) iyo mudacyada (wicks). Sida caadiga ah qiimuhu waa kor (bullish) ama hoos (bearish) sidaa darteed ul-shamaceedka tilmaama ama cabira qiimaha kor u socda waa kan leh midabka *cagaarka*[3] ah ee sawirka kore ama kan bidixda xiga. Ul-shamaceedka sheega qiimaha kor u socda waxaa uu ku furmaa hoos waxaana uu ku xirmaa kor, halka uu kan midigta xiga ama casaanka/guduudka ee cabira qiimaha hoos loo wado uu ku furmo kor kuna xirmo hoos. Mid walba oo labadooda ka mid ahi waxaa uu leeyahay labo mudac oo kor iyo hoos ka taagan, mudacaasi waxaa uu tilmaamaa meesha qiimuhu gaaray muddadii uu samaysmayey ul-shamaceedku

[3] Waxaa laga yaabaa in buugga mararka qaarkood lagu daabaco madow iyo caddaan (black and white) oo uusan muujin midabka aan kor ku tilmaamay kaliyana uu ka dhigo madow iyo caddaan sida ugu fududna waxaad ku garan kartaa kaan ka hadlayaa waa kan bidixda xiga.

aanse ahayn meeshii lagu xiray sababtoo ah xiritaanka iyo furitaanku waxaa uu ku egyahay uun jirka runta ah (real body) adoo xusuusan in ul-shamaceedka cabira qiimaha kor loo wado uu ku furmo hoos kuna xirmo kor kan kale ee cabira qiimaha hoos loo wadana uu ku furmo kor kuna xirmo hoos.
Sida ay la qabaan dhammaan soo bandhigayaasha qiimuhu (price charts), ul-shamaceedyadu waxay ku shaqayeen waqtiyo kala duwan (time frames) sida 1 daqiiqo, 3 daqiiqo, 5 daqiiqo, 15 daqiiqo, 30 daqiiqo, 1 saac, 2 saac, 4 saac, 1 maalin, 1 todobaad iyo bil. Mid walba oo ka mid ah waqtiyadaan wuxuu u taagan yahay waqtigii uu ku samaysmay ul-shamaceedkii lala doortay waqtigaas. Tusaale ahaan haddii aad dooratid waqti 1 saac ah ul-shamaceedka kuu muuqda xilligaas waxaa uu ku samaysmay 1 saac. Haddii aad saacadda u bedeshid 4 saac ul-shamaceedka kuu muuqanaya xilligaas waxaa uu ku samaysmay 4 saac oo macneheedu yahay 4 ka mid ah kuwii min 1ka saac ku samaysmay ayuu ka kooban yahay iyagoo la isku daray laguuna soo gudbiyey celceliska jihada qiimuhu aaday, oo haddii markii ay 1ka saac doornayd ay afarta ul-shamaceed saddexna kor ahayd halna hoos ahaa markaas kan 4ta saaca ahi waxaa uu kuu soo gudbinaya ul-shamaceed kor u socda maadaama ay saddexdu ka badan yihiin halka soo haray oo celcelisku kor yahay.



WICK

Mudacyadu (wicks) waa labada caaradda fiiqan ah ee ka taagan ul-shamaceedka labadiisa af. Waa qayb ka mid ah ul-shamaceedka se waxay cabiraan meesha qiimuhu

gaaray intii uu samaysmayey ul-shamaceedkaasi. Mudacyadu waa ay kala dheeraan karaan sida ka muuqata sawirka, kan hoose ha dheeraado ama kan sare ha dheeraado e.

DOGI



Dogi waa calaamadda iskutillaabta ah ee ka muuqata bartamaha sawirka ee goobaduna gashan tahay. Sidiisa caadiga ah waa ul-shamaceed laakiin qiimihii ayaa ku xirmay kobtii uu ku furmay oo dhinacna looma kaxayn taas ayaa keentay in uu qaab dhismeedkaas yeesho. Dogi waxaa uu astaan caddayn ah u yahay in qiimaha loo wareejin doono jihadii uu awal u socday mooyee tan kale ee ka soo horjeedda sida ka muuqata fallaaraha. Taas macneheedu waxaa weeye haddii aad Dogi aragto qiimahana kor loo waday hoos ayaa loo bedeli doonaa lidkuna waa lamid (Vice versa). Iyadoo ay sidaa tahay xusuusnow in aan mar walba xeerka loo hoggaansamin oo uu sarrifkuba yahay “Cidina jawaabta garan mayso 100%” laakiin waxa la isku

dhaafay ay yihiin barashada dabeecaddiisa, aqoonta aad u leedahay iyo sida ay hadba gacantaadu ula qabsatay.

QASAARE JOOJIN (STOP LOSS, SL)

Waxaa loo soo gaabiyaa ama loo qoraa ‘sl’. Sida ereygu tilmaamayo waa qasaare joojin ama in xaddiga lacageed ee aad lumin karto lagaa joojiyo markii meel cayiman la gaaro. Sl aad ayey muhiim u tahay markii laga hadlaayo ganacsigaan oo maadaama aan la hubin dalabka la diray (order) in uu ku waafaqi doono iyo in kale waxaa lagama maarmaan ah in aad ku talagashid in lagaa guulaysan karo oo roogga lagaa hoos siibi karo aadna waayi karto xoogaagii aad ku soo gashay dalabkaas, marka si haddii qasaare yimaado aysan qasaaradu kuugu fogaan oo lagaaga joojiyo markii ay marayso meel aad adigu calaamadsatay ayaa la adeegsadaa sl.

Nafsad ahaan (psychologically) suuqu sarrifku waxaa uu u baahan yahay inaad u dhisan tahay oo laba shayba waa la iska ilaashaa;

1. Waa mide in aad faa’iido badan qabatid oo aad farxad badan dareentd sababatoo ah dareenku in uu aad kaco waa guuldarradaada marna haddaad aad u faraxdid waxay saansaan u tahay inaad ku guul darraysan doontid kuwa soo socda. Maxaan sidaas u leenahay? Ganacsigani uma baahna laab-lakac (emotion) oo laab-lakacu waa dareen aan run ahayn badanaana laga qoomameeyo markii uu kaa ba’o. waxaa laga yaabaa inaad dalab ku guulaysatay adigoo lot weyn ku galay oo aad lacag fiican ka qabtay, haddii aad cusub tahay waxay u badan tahay in aad kuwa soo socdana aad isla lotkii ama mid ka weyn ku

gashid oo aad inta ku qasaartid ay kugu abuuranto murugo badan lagaana soo celiyo wixii aad qabatay markii hore iyo wax lagaaga darsadayba.

2. Waa kan labaade waxaa kaa reebban inaad murugo badan dareentid iyadoo ay sabab u tahay qasaarihii ku gaaray taasoo sababi karta inaad ku xanaaqdid inta kuugu hartay akoonka ama aad suuqaba ka baxdid.

Si haddaba looga badbaado laba dareen ee kore ee farxadda badan iyo murugada badan ah waxaa la inaga rabaa inaan adeegsano maarayn khatareed suubban (proper risk management) taasoo saldhig u noqon doonta inaan dareenkeena maamulno iyo in haddii qasaare kastaa yimaado aanana murugo dareemin. Waxaana aasaasi u ah inaan sl adeegsano taasoo ay wehliso Lot u dhigma akoonkaaga.

Marka sl la dhiganaayo waxaa lagama maarmaan ah in aad u jeedo u dhigtid meesha aad dooratay oo badanaa waxaa lagu saleeyaa caabbi korkiis iyo taageere hoostiis boosaskaas oo aad u dooratay inaan si sahlan lagu dhaafi doonin awgeed. Waxaa sidoo kale aan la hurayn aad yeelatid qaab aad sl-ka u dhigtid oo ku salaysan boqolleyda aad dalab walbaa ku qasaari kartid sida in aad dalab walbaa qasaarihiisa ka dhigtid 2% ama in ka yar ama ka badan waxaana wanaagsan in aan laga badan waayo ma rabno inaan wax badan raadino si aanan wax badan u lumin.

Tusaale:



Shaxdani waxay muujinaysaa EURUSD oo 4 saac ah. Waxay ku jirtaa socod hoose waxaana ay hadba taabanaysaa xarriiqda janjeerta ee dhinaca kore ka saaran waxayna ku tahay caabbiye janjeera (trendline esistance). Aynu ka soo qaadno inaad u diyaarsannahay inaan ka soo iibsano marka uu qiimuhu gaaro kobta goobada ku calaamadsan ee aan wali la gaarin se qiimuhu hadda ku dhaw yahay. Markii uu halkaas gaaray ayaanu 'sell' niri , markaa waa inaan sl ka dhiganayaa xarriiqda janjeerta korkeeda meesha 'stop loss' ku qoran tahay. Sababta aan halkaas u dooranayna waxaa weeye in aan waxuun kalsooni ah ku qabno inaan la gaari Karin ilaa suuqu si toos ah oo xooggan kor ugu dhaqaao taasoo ku habboon in la xiro haddii uu halkaas gaaro.

Ugu dambayn saddex shay waa in aan xusuusnaan marki aan sl dhigayno;

1. Boos ku habboon: sida kan sawirka ka muuqda oo ah meel caabbiye ka sarraysa ama taageere ka hoosaysa oo ah boos ay adag tahay in la jabiyo gadaashiis.

2. Boqolleyda qasaare: markii aad dooratid booska aad dhigaysid waxaa xiga inaad xisaabisid inta pip ee u dhaxaysa meeshaad ka gashay iyo meesha qasaaruhu kaaga egyahay. Intaa dabadeed waa in aad xisaabisid boqolkiiba intee ka yahay akoonkayga, badana waxaa wanaagsan in laga dhigo 2% oo haddii ay akoonka kuugu jirtey $1000 sl-kaagana aad ka dhigtid 20 pip lot-kaagana aad ka dhigtid 0.1 (standard account) oo ah halkii pip hal dollar) 1 pip/dollar) taas macneheedu waxaa weeye 20 dollar ayaad khatarta galisay oo u dhiganta 2% akoonkaaga.

3. Kan saddexaadi waa inaad lot-kaaga ka dhigtid mid akoonkaagu qaadi karo oo adoo boqolleyda ka duulaya aad lotkaaga ilaalisid sida inaad ka dhigtid mid u dhigma sl-ka aad dooratay ee boqolleyda ku salaysnaa sida midka tirada 2aad ku jira ee ah (0.1).

Akoonada lot-ka lagu galo badanaa waxaa lagas dhigaa sidatan ama ka yar ba:

Akoonka ($)	Lotka	Dollar/pip
10,000	1	10
1000	0.1	1
100	0.01	0.1

Lotka aynu dooranay waa kan ugu amniga badan waxaana sii wanaagsan in laga sii yareeyo si aan ugu yaraan ganacsiga ugu sii jirno xitaa haddii qasaare yimaado oo aan akoonkeenu u guban. Boqolleyda qasaare ee 2% aynu ka dhiganay akoonka 10kun ku jirto waa 200 dollar, kan 1000 dollar ku jirto waa 20 dollar, kan 100 dollar ku jirtana waa 2 dollar. Sidaa darteed haddii adoo 10kun kuugu jirto aad 200 lumiso dhib male, haddii

adoo 1000 haystana aad 20 dollar lumiso iyana ma cusla, ugu dambayna 100 dollar oo 2 dollar ka luntay ma adka suuqana kaa saari mayso xamaadad xanaaqeedna kugu beeri mayso ee intaad jafato ayaad dib ugu soo laabanaysaa dukaankaagii dibna aad idugu diyaarinaysaa dagaal hor leh iyo inaad faa'iido raadsato. Waana intaas sababta sl-ka loo sameeyey.

FAA'IIDO QAADASHO (TAKE PROFIT)

Markii aad qasaaraha bar cayiman oo aad ujeeddo ku dooratay isaga xirtid waxaa iyana muhiim ah inaad leedahay bartilmaameed faa'iido, taas ayaana la yiraahdaa *take profit* loona soo gaabiyo TP.



Faa'iido qaadashadu waa qaab automatic ah oo markii uu qiimuhu halkaas aad calaamadasatay soo gaaro is jaraya xitaa haddii aadan adigu gacantaada ku xirin sidaasna uu faa'iidada kuugu darayo haraagaagii guud.

Sawirka sare waxaa uu tusaale u yahay tp waana labo bartilmaameed (tp1 &tp2) oo ku kala astaysan laba xariiqood ee

casaanka/guduudka ah fallaarta buluugga ahina ku fiiqan tahay. Tp1 waa xarriiqda kore halka kan labaadina yahay xarriiqda hoose maadaama dalabku iska iibin ‘sell’ yahay. Badana tp waxaa lag dhigtaa bar aad isleedahay ilaa la dhaafo ma soo noqonayo qiimuhu oo sida ku cad sawirka qiimuhu waxaa uu ku jiraa socod hoos ah waxaana laga filayaa marka uu taabto xarriiqda sare in uu hoos u soo dhaco ilaa dhinaca hoose ee kanaalka hoos u socosho (down trend channel). Sidaas Ayaan meel jidka ah looga dhigtay tp.

Tusaale:

Waxaan soo qaadanaynaa tusaale dhammaystiran oo qeexaya meelaha ku habboon in sl iyo tp laga samaysto iyo maarayn khatareeda oo iyana ku muujisan dalabkaas (order) iyo inagoo



galin donna platformkeena.

Xogta ku qoran jaartiga kore waa sidan:

EURUSD:

Sell at: 1.1461

SL: 1.1681

Tp: 1.1355

Yacni EURUSD iska gad ‘sell’ marka qiimeheedu marayo 1.1461, waxaanad qasaare joojinta ka dhigataa lacalla haddii lagu dabamaro kobta qiimeheedu yahay 1.1481. haddii ay dhacdo in qiyaastaadu sax noqotana waxaad bartilmaameedka faa’iido ka dhigataa barta qiimeheedu yahay 1.1355 oo dabcan hadda xoogaa loo soo jiro.
Sida aad jaartiga ka arki kartid dalabkaani waa mid in door ah la soo dhaafay bartii laga soo galayey oo maraya meel kala barka bartilmaameedka ku soo dhaw oo 38% ayuu ka soo dhaqaaqay meeshii laga soo galay.
Marakana aynu gelino MT4-ka:



Waa aynu gelinay xogtii la ina siiyey sida sl,tp iyo lot. Lotka waxaynu ka dhiganay 0.10 inaga oo ka dhigayna in akoonka ay 1000 inoogu jirto akoonkuna uu yahay standard. Barta laga galayo (entry point) lama qoro iyada, oo signalka markii aan samaysano ama la ina siiyo waxaan sugaynaa inta qiimuhu ka gaarayo barta gelitaanka. Intaas dabadeed Ayaan sl iyo tp gelinaynaa. Boqolleyda qasaaraha waxaan ku salaynay 2% oo akoonka 1000 dollar ayaa ku jirta waxaanna sl ka dhiganay meel

20 pip u jirta barta gelitaanka lotkeenuna waa 0.10 akoonkuna waa standard halkii pip-na waxaa uu u dhigmaa 1 dollar, sidaas darteed 20 dollar ayaan khatar gelinaynaa.
Dhinaca faa'iido qaadashada isagu waa uu ka badan yahay khatarta oo bartilmaameedku waa ka durugsan yahay qasaare joojinta. Haddii aan kala jarno barta gelitaanka iyo bartilmaameedka waxaa inoo soo baxaysa 106 pip. Halkii pip-na waa 1 dollar sidaa darteed markii trade-kaani guulaysto waxaan helaynaa 106 dollar, halka haddii la qasaarana aan luminayno 20 dollar farqiga u dhexeeyaana waa 86 dollar sidaa darteed ay laba shay midkood dhici doonto oo ah in aan 20 dollar weyno iyo in aan 106 dollar helno. Saamiga khatar-faa'iidana (risk reward ratio) waa 5:1. Oo faa'iidadu 5 jeer ayey ka badan tahay qasaaraha.

CAABBI IYO TAAGEERE (RESISTANCE & SUPPORT)





Caabbiga iyo taageeruhu waa baro/meelo qiimuhu ka soo laab-laabtay oo loo diidan yahay in la dhaafiyo. Waxaa ay labaduba noqon karaa mid kor **ama** hoos u socda oo lagu muujiyo xarriiq janjeerta ama mid kor **iyo** hoosba u socda oo lagu muujiyo xarriiq toosan. Markii qiimuhu kor u socdo wixii ka hor yimaada oo diida in meel cayiman la dhaafiyo waxaa la yiraahdaa Caabbi (resistance) meesha uu cuskaday ee laga soo kexeeyeyna waxaa la yiraahdaa taageere. Markii qiimuhu hoos u socdo wixii ka hor yimaada oo diida in halkaas la sii dhaafiyana waxaa layiraahdaa taageere. Caabbiga waxaa lagu muujiyaa xarriiq kor ka xigta meesha hadda qiimuhu marayo sida ku cad laba sawir ee kore.

Marka ugu horraysa ee la furo jaartiga ma lahan wax xarriiqo noocaas ah oo ku yaal jaartiguna waa uu isku dhex yaacsan yahay lama odorosi karo meesha wax u socdaan sidaas darteed ayey platform-yadu waxay sameeyeen qalab fara badan oo lagu saadaaliyo laguna garwaaqsado dhinaca qiimaha loo wado. Qalabka ugu habboon ee uu qiimuhu badanaa addeecana waxaa ugu muhiimsan caabbiga iyo taageeraha.
Markaas inta laga soo doorto meesha ay ku jiraan ayaa lagu cabbiraa si ku habboon, markaad adeegsatana markiiba waxaa kuu muuqanaya sida wax u socdaan oo labada sawir kan hoose haddii aynu eegno waxaan toos u arki karnaa in qiimaha hoos loo wado oo uu ku dhex noqnoqonayo laba xarriiqood oo tan sare caabbi tahay tan hoosan taageere.

Trend line



Xarriiqda janjeerta ee buluugga ah ee jaartiga kor iyo hoos kaga dherersan ayaa la yiraahdaa trendline. Waxaa loo adeegsadaa in lagu ogaado caabbiga iyo taageeraha qiimaha markii uu suuqu u samaysan yahay sida sawirka ka muuqata ee higher high. Badanaa markii uu saas oo kale u samaysan yahay waa la gataa haddii uu taageeraha (laba xarriiqood tan hoos xigta) soo taabto haddii uu tan sale gaarana waa la iska iibiyaa. Laakiin waxaa suurawda in lag duso xarriiqda sidaa darteed aad sugtid in uu is caddaynayo oo uu kor ka aadayo haddii uu xariiqda hoose soo taabto ama uu hoos ka aadayo haddii uu xarriiqda sare soo taabto. Sababta aan u sugaynana waa in laga yaabo in lag duso xarriiqda si isla sawirka ka muuqata oo dhinaca hoose saddex jeer oo hore ayuu soo taabtay oo misana ka noqday laakiin markii afraad ayuu ka dusay oo haddii aad iska gadi lahayd durbadiiba marka uu xarriiqda taabta sidaas ayaa dhici lahayd oo waad ku qasaari lahayd, waana sababta aan u niri aynu sugno.

BID & ASK



Qiimaha uu doonayo in iibsaduhu bixiyo ayaa la yiraahdaa BID, qiimaha uu doonayo in iibiyuhu helana waxaa la yiraahdaa ASK.Labada sawir ee kore midka bidixda xiga waa bid-ask goorta la galo MT4-ka marka qaybtiisa dalabka (order) laga diro la sii furo. Sawirka kale ee midigta xigana waa marka uu jaartiga (chart) ka muuqdo oo ha moodin in spreadka lacagtaasi badan yahaye 1 daqiiqo ayaan kuu cabbiray oo misna soo dhaweeyey oo farqiguba waa 2 pip.

Markii aad iska gadid ‘sell’ qiimuhu waxaa uu kaaga bilaabmayaa xarriiqda hoose ee buluugga ah si lagaaga jaro spread-ka oo marka labada xarriiqoodba qiimihii aad ka gashay hoos u dhaafaan ayey faa’iidadu kuu bilaabmaysaa. Sidaas si lid ku ah markii aad soo gadatid ‘buy’ qiimuhu waxaa uu kaaga bilaabmayaa xarriiqda sare ee guduudka ah inta ay labada xarriiqoodba dhaafayaan qiimihii aad ka gashayna faa’iidadu

kuu bilaabmi mayso. Oo kala jarka ask iyo bid ayaa spread la yiraahdaa.
Waxaa xusuusin mudan in ay brokeradu ku kala duwan yihiin spreadka oo xitaa hal broker laftiisu sii kala badan yahay nooca akoonka aad dooratay awgeed. Haddii aad doonaysid in aad broker xulatid waa muhiim in aad spreadka ka eegtid iyo xogo kale oo badan sida sharciyaddiisa.

LEVERAGE



Leverage waa deyn. Ka soo qaad inaad rabtid inaad gadatid guri 100,000 dollar jooga. Waxaad tagtay bankiga waxaadka ka soo qaadatay 20,000 dollar. Gurigii ayaad ku gadatay qaybtiis oo ah 5:1 oo ah inaad gurigaas shan meelood meel leedahay. Waad haysay gurigii sanad ka dib waxaa ku kordhay 50% qiimihiisii oo wuxuu noqday 150,000 dollar. Intaa dabadeed waad iska sii iibisay waxaadka ka faa'iiday 50,000 dollar. Marka leverage-ku

waa deyn kuu fududaynaysa inaad gadatid wax aadan lacagtooda haysan.
Marka laga hadlaayo suuqa sarrifka dadkeena akoonada yaryar haysta ma gadan karaan lacagaha oo waa qiime aad u badan sidaa darteed ayaa broker-ku waxaa uu inoo fududaynayaa inaan soo gadano lacagahaas qaaliga ah oo waxaa uu ina siinayaa deyn la yiraahdo leverage.
Deyntaani adiga wax saamayn ah kuguma lahan oo ribo ma saarna ee kaliya adiga ayaa lacagtaada lagu xoojinayaa.
Ka soo qaad inaad isticmaasho akoon leverage-kiisu yahay 1:100, taas macneheedu waxaa weeye mar kasta oo aad suuqa ku gashid 1 dolla waxaad ku gashay 100 dollar oo 1 dollar suuqan waxba kama goyso, mar kasta oo aad 1 dollar ku gashidna 100 dollar ayey kuugu dhigantaa taas oo sababi karta inaad 1 dollar ka samaysid 100 dollar iyo ka badanba haddii qiyaastaadu saxnaato ama qorshahaagu guulaysto.
Aan ku celiyo in deyntaani aysan adiga saamayn kugu yeelan doonin oo kaliya ay tahay xoojin uun brokerkuna taas masuuliyadeeda leeyahay. Khasab maaha inaad leverage-ka qaadatid, haddii aad haysato akoon weyn waxaa kuu bannaan inaad la'aantiis ku ganacsatid oo aad ka dhigatid 1:1 taasoo ah kaliya lacagtaada ayaad ku ganacsanaysaa.

HANTI IYO HARAA (EQUITY & BALANCE)



Equity waa hantida kuugu jirta akoonkaaga. Equity iyo balance kala duwanaanshaha u dhexeeya ayaa ah equity-gu waa marka lagu daro lagana jaro dalabyada furan faa'iidadooda iyo qasaarohooda halka balance uu ka yahay qiimaha akoonka intii aan la furin dalabyada hadda furan (open positions) oo mar kastaa waxaa uu qorayaa qiimihii ugu dambeeyey intii aan la furin dalabyada hadda furan markii la xiro dalabyadaasna waa uu is bedelayaa isagoo ka jaraya kuna daraya waxa aad kala kulantay dalabyadii aad xirtay.

Tusaale haddaan u soo qaadano sawirka kore ee laga qaaday MT4, haraagu waa 3597.32 halka hantidu ay ka tahay 3329.82 taas macneheedu waxaa weeye waxaa furan dalab ku jira qasaare dhan 254.

Oo ay sii wehliyaan waxyaabo kale loo goyn doono 13.5-ka soo haray laakiin ujeedadu waa in hantidu ay noqon doonto markii lagaa jaro wixii lagugu lahaa isla waqtiga uu furan yahay dalabkaasi, haraaguna uu yahay in laguu soo bandhigo hantidaada markii dalabkaas la xiro.

RIBO (SWAP)



Swap-ku waa ribo, rabadaasna waxaa laga qaadayaa dalab kasta oo aad furtid sida ka muuqata sawirka qaybtiisa hoose ee muujinaya qiimaha 13.5ka ah. Sida aan wada ognahay diinta Islaamku ma ogola ribo oo waa xaaraan inagiina Muslimiin baanu nahay marka maxaa inoo talo ah? Si aan ganacsigan uga shaqaysano ribadana uga badbaadno waxaan furanaynaa koontooyin Islaameed (Islamic accounts) ama (swap free accounts) halkaas oo aan nalaka jari doonin wax ribo ah ganacsiguna xalaaloobi doono.

Commission

Isna waa khidmad kale oo broker-ku qaato markii aad dalab qaadatidba. Waxaa jira brokerro commission ka qaada koontooyinka Islaameed kuwa aan ka qaadina waa jiraan laakiin mar haddaad ribada iska xirtid waxay u badan tahay in commission lagaa qaadi doono. Commission-ku waxaa uu ku sii badan yahay akoonada ECN-ka (electronic communication network) la yiraahdo ee spread-koodu yar yahay si ay kaaga soo ceshadaan wixii aad meelaha kale uga siibatay.

Sawirka sare ayuu ka muuqdaa meesha commission-ka lagu soo qoro ee isaga ka eeg.

QIIMAHA GELITAANKA IYO KA BIXITAANKA (ENTRY AND EXIT PRICES)

Qiimaha gelitaanku waxaa uu tilmaamaa ama soo bandhigaa bartii aad ka gashay qiimaha. Kan ka bixitaankuna meeshii aad



uga baxday markaad xidhay dalabkaas. Tusaalaha sare waxaa uu muujinayaa GBPUSD in aan ka galnay qiimuhu markii uu marayey 1.27823 kana baxnay markii uu marayey 1.28083 dalabkuna soo iibsasho 'buy' ahaa sidaa darteed aan ka faa'iidnay 26 Pips.

SERVER

Markii aad broker iska diiwaan geliso wuxuu ku siinayaa boos aad kaga mid noqoto oo aad xogtaada ku kaydsato sidoo kalana kuu qaabilsan waxqabadyadaada. Meeshaas ayaa la yiraahdaa server. Serverku waa kambayuutaro waaweyn noocayada la yiraahdo Mainframes iyo kuwa la mid ah oo loo adeegsado in

lagu kaydiyo xogaha waaweyn ee tirada badan waana midka ay adeegsadaan shirkadaha waaweyn iyo websityadu si ay u kaydiyaan xogaha dadyowga badan ee ku xiran bartaas, waxaana kambayuutarka noocaan ahi u suuragelinayaa in ay markiiba kumanaan qof isticmaalaan adeeggiisa.
Brokerradu waxay leeyihiin servero kala duwan; kuwo ay ugu talagaleen akoonada ku barbarashada (Demo accounts), kuwo ay ugu talagaleen dadyowga isku waddanka ka soo jeeda iyo kuwoo kaloo badan.
Sawirka hoose waxaa uu muujinayaa dhawr sever oo uu leeyahay brokerka Fxprimus.



Login: kobtaan waxaa loogu tala galay inaad gelisid ID-gii uu ku soo siiyey brokerku.
Password: booskaana waxaa loogu tala galay fure-sireedkii aad soo yeelatay markii aad abuuraysay koontadaadii brokerka.

History: halkaan waxaad kala soconaysaa diiwaanka dalabyadii aad xirtay faa'iido iyo qasaare kii ay doonaanba ha noqdeene.

CHART



Waa barxad weyn oo ay ku jiraan qalab tiro badan oo kuu fududaynaya inaad qiyaastid isbedelka qiime ee dhici doono saacadaha ama maalmaha soo socda. Waa meesha ay ku jiraan qalabkii saadaasha qiimaha oo dhan.

TRADE:

Halkaan waxaad ka arkaysaa dalabyada furan xilligaas la joogo. Magaca *trade* waxaan in badan ku soo turjunay *dalab* oo la mida *order*.

QUOTES:



Waxaa ku taxan lacagihii oo labo-labo isu saaran waana meesha looga soo daro lacago cusub ama laga tirtiro kuwa horay ugu jirey Pip: halbeegga la adeegsado markii la xisaabinayo isbedelka dhacay. Sida aan wada ognahay shay walbaa waxaa uu leeyahay halbeeg sida dhererka loogu cabiro mitir, culayskana garaamka ayaa isbedelka ku dhacay suuqaana waxaa lagu cabiraa Pip.

XISAABINTA PIP-KA

PIP (percentage in price): waa shayga lagu cabiro ibedelka koror ama dhinnaansho ee lacagaha. Haddii dhererka lagu cabiro mitir, culayskana garamaa, lacagta suuqa forex waxaa lagu cabiraa PIP.

Sidoo kale qaabka loo ogaado pipka shay kasta oo suuqa ku jira waa uu ka duwan yahay nooca kale, tusaale ahaan lacagaha ka kooban 5 lambar oo dhibicda (point) dhinaca midig ka xiga waxaa pipkoodu noqdaa lambarka 4aad ama haddii ay 4 lambar dhinaca midig ka xigto isla lamabarka 4aad ayaa ah.

Lacagaha ka kooban 3 lambar ama 2 lambar oo dhibicda ka xiga dhinaca midig sida lacagaha ay la socoto YEN ama lacagta jabaanku, pipka waxaa lagu soo saaraa in tirada oo dhan caadi loo kala jaro dabadeena lagu dhufto 100 haddii ay ka kooban

tahay 3 lambar oo ka xiga dhinaca midig dhibicda. Haddii ay dhinaca midig dhibicda ka xigaan labo lambar waxaan ku dhufanaynaa 10 ka dib kala jarkooda.

LOT:



Waa awoodda aad rabtid inaad ku soo gashid lacagta aad dooratay. Lotku waa meesha aad ka xukumaysid inta doollar ee aad rabtid in PIP-kiiba kuu noqdo.
Waxaa jira saddex nooc oo lots ah kala awood badan oo la doorto marka akoonka laga furanayo dullaalka, waana:

1. **Standard lot:** akoonka noocaan ah waa kan ugu weyn saddexdoodan, halkii PIP-na waxaa uu u dhigmaa 10 dollar. Haddii aad sii jajabisid waxaa kuu sahlanaanaysa inaad sii yaraysid adiga oo aan nooc kale oo ka awood yar u badalin.
2. **Macro lot:** waa midka awood ahaan xiga kan hore, halkii PIP-na waxaa uu u dhigmaa 1 doollar.
3. **Micro lot:** waa kan ugu yar saddexdooda, halkii PIP-na waxaa uu u dhigmaa 0.1 doollar.

Xilligaan la joogo waxaa la samayn karaa in standard inta la furto la adeegsado lots jajaban. Tusaale:
Meeshii aad inta akoon macro ah furatid isticmaali lahayd lot 1, waxaad isticmaali kartaa lot 0.1 adiga oo standard haysta.

CUTUBKA: 6

FARSAMOOYINKA KA GANACSIGA SUUQA

FARSAMOOYINKA KA GANACSIGA SUUQA

Mar haddii aad soo fahamtay sida suuqu u shaqeey, sida koonto looga furto dullaal, sida Demo loo sameeyo iyo erey bixinta afka suuqa looga hadlo, marakan waxaa kuu dhimman oo kaliya sida suuqa looga shaqaysto iyo farsamooyinka kala jaadka ah ee loo maro.

Waxaa jira 2 nooc oo waaweyn oo suuqaan looga shaqaysto waana;

1. Wararka (news/fundamental analysis)
2. Farsamada (technical analysis)

Waxaa mararka qaar la soo raaciyaa mid saddexaad oo la yiraahdo sentiment analysis oo ah in la fiiriyo in suuqu kor (bullish) ama hoos (bearish) yahay, waxaana wanaagsan in laftiisa la adeegsado oo aan la iska indha saabin dheeftiisa. Haddaba aynu labada kore mid mid u dul istaagno oo aan aragno sida ay u shaqeeyaan iyo wax ay ku kala duwan yihiin.

WARAR (NEWS/ FUNDAMENTAL ANALYSIS)

Waa inagii horay u soo sheegnay in aan lagu ganacsan waddan kasta lacagtiisa, oo kaliya awoodda la saaro waddamada xogtooda dhaqaale iyo middooda amniba la hayo sida joogtada ahna u soo saara xogtaas.

Tani waxay kaalmaynaysaa in aad ku ganacsato farsamadaan (fundamental analysis).

Qaabka ay u shaqayso farsamadaan ayaa ah in marka waddan hebel oo aad lacagtiisa ku ganacsato uu soo saaro warbixin sida:

1. GDP (gross domestic product).
2. NFP (Non farm payroll)
3. Interest rate decision
4. Unemployment rate

5. Employment rate
6. Madaxweynaha waddankaas oo hadla
7. Madaxweynaha bankiga dhexe ee waddankaas oo hadla
8. doorashooyinka
9. Home sales
10. PMI (producer price index)
11. CPI (consumer price index)
12. iwm

Marka ay warar noocaas oo kale ahi ka soo baxayaan waddanka aad lacagtiisa ku ganacsanayso ayaa la yiraahdaa fundamental analysis. Waxaa jira meelo laga ogaado wararkaan oo waliba waxay sii sheegaan in saacad hebla uu soo bixi doono war hebel oo uu kuuba sii sheego si aad ugu sii diyaar garowdo gambaleelna ugu sii xirato saacaddaada.
Meelaha laga ogaado waxaa ka mida website-yada investing.com iyo forexfactory.com oo aan labadaba horay uga soo hadalnay faahfaahintoodana aan youtube-ka isku dirnay. Haddii aad soo akhriday waa tii aynu niri investing.com waxaa uu ku siinayaa warka, saacadda, saamaynta iyo filashada. Iyo xitaa falcelinta lagaa rabo markii warku laba jaho midkood noqdo.

Tusaale: 1
Waxaanu joognaa **investing.com** waxaan helnay warka sidaan ah:
Waxaan isha ku dhufanay warkaan:



*FG: **prev**: previous (hore). Waa xilligaan xilligiisii kale inta ay ahayd warbxintani.*
***Cons**: forecast (saadaal). Waa inta lagu saadaalinayo in ay noqoto warbixintani.*
***Act:** actual (runta). Waa inta rasmiga ah ee ay noqoto.*
Webka inveting.com waxaa uu leeyahay daaqado kor ka soo baxaya markaad joogtid 'economic calender' oo kuu kala tilmaamaya xilliyada sida berri, maanta, shalay, todobaadkan, todobaadka soo socda.
Aan sii falanqaynee warku waxaa uu tilmaamayaa in waddanka ingiriiska ay ka soo bixi doonto war bixinta xaddiga shaqo la'aanta marka saacaddu tahay 4:30. Waxaa uu sii raaciyey in warbixintaan teedii ka horraysay ee iyadoo kale ahayd ee Ingiriisku ahayd 4.1% sidoo kalana laga filanayo in ay isla inteedii ahaato oo ah 4.1%. Markaas ayuu sii raaciyey war bixintaan hoos ka muuqata.

A higher than expected reading should be taken as negative/bearish for the GBP, while a lower than expected reading should be taken as positive/bullish for the GBP.

Oo ah "wixii ka sarreeya inta la filayo waxay Pound-ka u noqonayaan wax taban (negative), halka wixii ka hooseeya wixii la filayey ay Pound-ka u noqonayso wax togan (positive)"

sababtuna waxaa weeye shaqo la'aantu wax fiican maaha oo badnaanshaheedu waddanka waa u xun yahay lacagtiisana sidoo kale yaraanteeduna waa u fiican tahay waddanka iyo lacagtiisaba.
Haddii aan warkii dib ugu laabano war bixinta intii laga filayey ka yar ayaa soo baxday taasoo Pound-ka u wanaagsan. Taasina waxay caddayn u tahay in ay xilligaas ku habboonayd in Pound-ka la gato (buy). Haddii ay soo bixi lahayd in ka badan intii la filayey sida 4.4% waxay Pound-ka ku noqon lahayd dhabar jab iyo in uu raqiiso oo uu hoos u dhaco.
Walow aysan saamayntu ahayn mid aad ah oo dhexdhexaad ay ahayd laguna muujiyey 2 madax misna wax uun bay dhaqaajinaysaa Pound-ka oo qofkii isla xilliga ay warbixintu soo baxday galay dhawr pip-na ha ahaatee wax buu ka qabtay.
Tusaale: 2



Warbixintu waxay tiri waddanka Maraykanka waxaa ka soo baxaya warbixinta guryo iibinta (home sales) marka saacaddu tahay 10:00. Waxay sii raacisay markii hore waxay ahayd 5.33M oo guri waxaana laga filanayaa 5.25M guri. Waxay kaloo ku sii dartay:

> A higher than expected reading should be taken as positive/bullish for the USD, while a lower than expected reading should be taken as negative/bearish for the USD.

Oo ah "wixii ka sarreeya inta la filanayo waxaa loo qaadanayaa si togan, halka wixii ka hooseeya inta la filayo loo qaadanayo si

taban. Taas oo ah haddii 5.25M oo guri in ka yar la iibiyey doollarka waa u jab iyo qiime dhac haddii ay ka badato 5.25M oo guri doollarka waa u wanaag iyo qiimekac. Marka intaas lagu yiraahdo waa aad taqaan waxaad samaynayso, waa gado marka ay wax ka badan soo baxaan ama iska gad marka wax ka yar ay soo baxaan.

Marka haddii aan dib ugu laabano wax bixintii waxaan arki karnaa inta soo baxday oo ah 4.99 Million oo guri taas oo ah in ka hoosaysa intii laga filanayey. Mar haddii ay ka hoos martay intii la filanayey waa in aan iska gadno ‘sell’ dollarka. Aan tusaale rasmi ah soo qaadano:

Markii warbixintu sidaas oo kale tahay waxaan sell oranaynaa lacagaha dollarku salka (base) u yahay sida:

USDCHF, USDGBP, USDNZD iwm. Waxaan sidoo kale buy oran karnaa lacagaha doollarku dhinaca midig xigo sida:

EURUSD, GBPUSD, JPYUSD iwm.

Haddii ay dhacdo inaad ku wareerto inaad buy dhahdo ama aad sell dhahdo marka warbixintu soo baxdo, waxaad si fudud ugu go’aan qaadataa midabka tirada rasmiga ee soo baxday. Tusaale: tusaalihii hore waxaa uu ahaa cagaar waana buy tusaalaha dambe waa guduud/casaan waana sell.

KU GANACSIGA FARSAMADA (TECHNICAL ANALYSIS)

Markii laga soot ago isbedelka suuqa ee ay keenaan wararku sida kuwii aan horay uga soo sheekaynay oo kale sidoo kale waxaa jira qaacidooyin uu adeeco una hoggaansamo suuqu. Waxa ugu waaweyn ee ku ganacsiga farsamadu ku salaysan yahay waa caabbi iyo taageere (resistance & support) iyagana kor ayaan uga soo hadalnay waxa ay yihiin aanse sii faahfaahsho oo dib ugu laabto:

- Marka qiimuhu kor u socdo ee ay ka hor imaato meel adag oo uu dhaafi waayo ayaa la yiraahdaa caabbi (resistance).

Tusaale:



Barta ku beegan qiimaha 1.13653 ee fallaarta cas ku foorarto ‘caabbi-na’ ku dul qoran tahay ayaa noqonaysa caabbiga. Sida kuu muuqta waxaa qiimaha laga soo kexeeyey 1.27030 kor ayuuna u socday ilaa laga soo celiyey 1.13653 halkaas ayaana ah caabbiga.

Sida hadda tusaalahan ka muuqata caabbiga noocaan ah waxaa lagu calaamadiyey xarriiq jiifta (tan madow ee fallaartu ku qotanto), hayeeshee caabbiga siyaalo kala duwan baa loo sawiraa:

1.



Tusaalahani waxaa uu la mid yahay kii aan kaga soo hadalnay kor ee xarriiqda toosan (horizontal line) ay kor ka xigtay oo markii qiimuhu soo gaaraba dib loo celinayey.
Haddii aan soo qaadano isagoo dhab ahna waa sidaan:



Haddii aan soo sheegnay in caabbiga iyo taageeruhu ka mid yihiin waxyaalaha ugu muhiimsan ee la fiirsho marka ku ganacsiga farsamada laga hadlayo, caabbig waa meel fiican oo

laga gadi karo shayga ama ‘sell’ laga oran karo. Oo sida aad ka aragtid labada sawir kan dambe qiimuhu waxaa uu joogaa meel laga soo celiyey mar hore waxayna u badan tahay in haddana la soo celiyo waa iyadii qaacidadu hayd ‘taariikhdu iyadaa isasoo celisa’.

2.



Mararka qaarkoodna waxaa uu noqon karaa qiime ku laablaabnaya xarriiq janjeerta oo kor socota sida ka muuqata jaantuska.

Haddii aan ku fiirino sawir dhab ah sidaan ayey noqonaysaa:



Sida inoo wada muuqata qiimahani waxaa uu u samaysan yahay qaab kor u socosho ah (uptrend) hayeeshee markii uu cabbaar kor u socdaba waxaa ka hor imaanayey xarriiqda janjeerta ee buluugga (trend line) oo markii uu taabtaba waa uu ka laabaneyey sidaa darteed xarriiqdu waa caabbi, waana caabbi janjeera oo kor u socda. Sidii si la mid ah ayaa markii qiimuhu soo gaaro xarriiqdaba iska iibinaynaa ama ‘sell’ oranaynaa.

3.



Mar kalana waxaa uu noqon karaa xariiq iyana janjeerta se uu qiimuhu hoos u socdo iyana hoos ula socota.
Aynu misna tan ku eegno sawir dhab ah:



Qiimuhu mar kasta oo uu soo gaaro xarriiqda janjeerta ee buluugga ah ee hoos u foorarta waa uu ka laabanayey sidaa darteed ayey u tahay boos fiican oo la isaga gadi karo shaygaas. Sida aan arki karnaba qiimuuhu waa uu ka baxay ugu dambayn caabbigii celcelinayey waana sidaasoo mar uun buu awalba ka bixi lahaa oo sicirku isbedeli lahaa.
Waxaan caabbiga ku soo koobaynaa waa marka qiime kor u socday la celiyo oo loo diido kor u socoshadiisa.

- Marka qiime hoos u socda ay kor imaato meel uu dhaafi waayo oo loo diido in laga hoos mariyo ayaa la yiraahdaa taageere (support). Tusaale



Barta ku beegan qiimaha 1.27030 ee fallaarta buluugga ahi ku fiiqan tahay hoosna ka xigto ee ah xarriiqda madow ee qiimuhu ku fadhiyo ayaa la yiraahdaa taageere (support)
Sida ereyga macnihiisa ka muuqata waa taageerid qiime liitay in la xoogeeyo ama la tabareeyo ama awood loo yeelo si uu uga soo kabto hoos u dhicii ku socday. Si kale haddii aan u dhigno waa marka qiimuhu soo dhaco oo meeli celiso si ay u taageerto dibna ugu celiso si ka soo horjeedda caabbigii oo isagu ahaa in qiime kor u kac samaynayey dib loo celiyo.

Sidii kii hore si la mid ah ayaa caabbigu yeelan karaa dhawr waji oo ah mid ku fadhiya xarriiq toosan ama kuwa ku fadhiya xarriiqo janjeera oo midi kor u socoto midina hoos u socoto, sida:

1.



Qiimihii oo soo dhacay ayaa la celiyey oo la taageeray dibna loogu celiyey meeshii uu ka soo dhacay ama aaggeeda.

Si rasmi ah aan u fiirino:



Xarriiqda madow ee taalla qiimaha 1.66147 ayaa ah taageeraha qiimahan. Sida aan wada arki karno saddex jeer ayaa qiimuhu

soo taabtay oo tijaabiyey xarriiqda mar kastana dib ayaa loo celinayey ilaa ugu dambayn toos uu uga tagay oo gabi ahaanba laga celiyey meeshii uu isku khasbayey.

2.



Taageeraha noocaan ahi waxaa uu ku fadhiyaa hadbana cuskanayaa xarriiq janjeerta oo kor u socota mar kasta oo uu soo gaarana waa la celinayey oo la taageerayey.

Sida uu u muuqanayo marka lagu fiirsho garaafka saxda ahna waa sidaan.



Markii uu siduu u socdaba soo laabto waxaa laga celinayey xarriiqda korkeeda ilaa uu markii dambe ka hoos baxay. Sababta ka hoos bixitaanka ayaa ah in awalba uu qiimuhu isku dayayey inuu jabiyo oo ka hoos baxo se loo diidanaa, waxaana habboon inaa durba la gadan ama la iska gadin marka qiimuhu ku dhisan yahay caabbi iyo taageere sababtuna tahay mar kaste waxaa suurgal ah in uu jabiyo oo laga duso meeshii celinaysay haddii ay caabbi tahay iyo haddii ay taageere tahayba, oo waxaa la fiiriyaa in uu marka uu taabtay xasilay iyo in kale. Haddii uu xasilo oo qaboojiyo waxay u badan tahay in uu laabto se haddii uu ku dhaafo xawaare waa loo kaadiyaa inuu dhaafo ayey u badan tahaye. Laakiin mararka qaar waxaa dhacda in uu xawaare ku dhaafo oo laceliyo waxaana la yiraahdaa jabin beenbeen ah (false breakout) oo aan dib uga hadli doonno.

3.



Marakana qiimuhu wuxuu cuskanayaa xarriiqda iyaduna janjeerta se hoos u foorarta oo qiimuhu quxuu sii raacaa isaga oo hoos loo wado hayeeshee ay xarriiqdu taageerayso oo markii uu soo gaaraba kor u celinayso.
Waana sidan marka si dhab ah loo eego:



Mararka qaar caabbiga iyo taageeraha waxaa laga dhigi karaa aag (area) oo meeshii aan awal xarriiqda ka adeegsanaynay waxaan adeegsan karnaa kuna bedelan karnaa aag. Haddii dabeecadda suuqa loo fiiriyo waxaadba mooddaa in aaggu ku saxan yahay caabbiga iyo taageeraha oo waxaa uu badanaa adeecaa aagga

mana aha in uu isku bar ka laabanayee waxaa uu ka laabtaa aag isku dhaw dhaw.

Aan tusaaleyaal soo qaadano:



Markii qiimuhu ka laabto ama laga celiyo meelo isku dhaw dhaw sida sawirka ka muuqata oo kale waxaad ku cabbiran kartaa taageere aag (area support) oo markii uu aaggaas ka soo dhawaadaba waad gadan kartaa, tan ka soo horjeedda ee caabbiguna waa la mid.

JABIN IYO DIB-U-TIJAABIN (BREAKOUT & RETEST)

Markii qiimuhu yimaado meel laga celiyo ama ha lagu taageero ama ha la caabbiyee, waxaa jira shay mar walba dhici kara kaas oo ah in meeshaas la jabiyo oo laga duso waxaana la yiraahdaa **jabin (breakout)**. Markii qiimuhu meeshaas yimaado ee uu ka duso kor iyo hoos kii uu doono ha kaga yimaadee waa uu tijaabiyaa meeshii uu jabiyey oo inta cuskado sii socdaa markaasna waxaa la yiraahdaa **dib-u-tijaabin (retest).**
Arrintaani mar kasta ma dhacdoo oo waxaa mararka qaar dhacda in uu qiimuhu meel jabiyo hayeeshee uusan dib ugu laaban oo uu sii socdo.
Aynu soo qaadono tusaaleyaal caynkaas ah:



Sida jaantuska ka muuqata qiimuhu xarriiqda ayuu kor uga yimi saa waa ay celisay, inta uu ku soo laabtay buu dhaafay, misna inta uu madaxa soo laabay oo uu soo taabtay ayuu hoos u dhiciisii sii watay.

Labada goobo midda madaw ee bidix xigta waa meesha uu ka jabiyey midda kale ee midigta xigtana waa meesha uu dib uga tijaabiyey. Marakana aan soo qaadano isagoo dhab ah illeen kii hore waa jaantus e.



Qiimuhu kor ayuu ka yimid waxaa uu jabiyey xarriiqda madow ka dibna madaxa ayuu ku dhufsaday waana uu dhaafay.

Aynu mar kale aragno tusaale qiime kor u socday oo isna jabiyey oo dib u tijaabiyey.



Qiimuhu hoos ayuu ka yimid, xarriiqda caabbiga ayuu dhaafay dabadeedna inta uu madaxa soo laabay ayuu isla xarriiqdii awal

caabbiga ahayd cuskaday oo taageere ayey u noqotay waana uu sii socday oo kor ayuu u sii dhaafay.
Sidaan ayey u ekaanaysaa markii si rasmi ah loo fiiriyo:



JABIN BEEN AH (FALSE BREAKOUT)

Waxaa dhacda marar badan in qiimuhu meel jabiyo asii ay been noqoto oo uusan sii socon oo meeshaas uu jabiyey laga soo celiyo oo caabbigii ama taageerihii uu joogay uusan dhaafin oo ugu yaraan loo celiyo jihadii uu ka yimid. Sidaa darteed marka qiimuhu meel jabiyo durba lama galo oo waa la sugaa bal in ay tahay tii beenta ahayd iyo in kale. Waa sidaan oo kale



Sida aad aragtid qiimuhu inta kor ka yimid ayuu jabiyey taageerihii qabtay oo si xawli ah ayuu madaxa ugala dusay, hayeeshee waa uu soo laabtay. Maxaase dhacay? Awal waxaan naqaanay in marka ay sidaan oo kale dhacdo uu inta dib u tijaabiyo sii wato dhicitaankiisa laakiin maysan dhicine dib ayaa loogu soo celiyey meeshiisii hore oo inta uu cuskaday ayuuba laabtay. Markaas oo kale waxaa uu sameeyey **jabin been ah** waana sababta aan u niri markii uu meel jabiyo waa la sugaa ina uu ka tijaabinayo, oo markaas ama inta uu tijaabiyo ayey noqotaa in uu sii dhaco ama sii kaco ama waaba jabin been ah sidan oo kale.

Waa sidaan marka si dhab ah loo fiiriyo garaafkeeda:



DIB-U-NOQOSHO (REVERSAL)



Sida lagu yaqaan suuqaan qiimuhu kor isagama socdo hoosna isagama socdo ee waa uu qalqalloocaa oo marna kor marna hoos ayuu u socdaayoo sidaas ayuu u dhaqmaa. Sida sawirka ka muuqata qiimuha intiisa fallaaruhu ku juujisan yihiin kor ayuu u socdaa soo saasoo ay tahay markii uu xoogaa socdaba waa uu soo jiiraynayaa oo hoos soo dhuganayaa. Qaabka noocaan ah waxaa la yiraahdaa qiime sixid (price correction). Markii qiimuhu si aad ah u kaco ganacsatada suuqaani waxaa ay ku xisaabamaan in ay u galaan jihahada ka soo horjeedda iyagoo noqoshada ka faa'idaysanaya hayeeshee aan ku sii dheeraanayn ee scalping ku cayaara.

CUTUBKA: 7
TUSIYEYAAL

TUSIYEYAAL (INDICATORS)

Markii lagu ganacsanayo qaabka farsamada ee *technical analysis* waxaa jira tusiyeyaal lala adeegsado oo kuu sii cadaynaya meesha qiimuhu aadi doono. Tuseiye waa qalab kuu sahlaya in ay kuu kala caddaato waxa dhacay, waa shay ku oranaya haddii ay sidaan dhacdo sidaas ayaa laga wadaa haddii ay sidaan dhacadana sidaas.

Tusaale ahaan tusiyeyaasha kiimikeed ee lagu kala aqoonsado asiidhka iyo beyska (acid & base) waxaa ay ina siiyaan midab la yaqaan haddii milankaasi asiidh yahay ama midab kale oo la yaqaan haddii milanku beys yahay. Tanina kama duwana oo waa sidii oo kale.

Inkastoo tusiyeyaashu ay qiimaha canjilaan (ku daydaan) oo marka qiimuhu si yiraahdo ay ka daba yiraahdaan, misana waxaa ay qayb libaax ka qaataan xilliga ku habboon in la galo iyo kan ku habboon in laga baxaba.

Haddii Alle raalli ka noqdana waxaan faahfaahin doonaa dhawr iyaga ka mid ah.

MOVING AVARAGES



Xarriiqda qiimaha la socota ee sida maska isku laalaabaysa ee marna qiimaha kor u raacaysa marna hoos u raacaysa ayaa la yiraahdaa MA (moving average). Tusiyehaan waxaa loo adeegsadaa sida tusiyeyaasha kalaba in lagu kala aqoonsado xilliga ku habboon in dalab la galo ama laga baxo. Marka ay xarriiqda MA ka hoosayso qiimuhu kor ayuu u socdaa marka ay ka korraysana hoos ayuu u socdaa. Sidaa darteed marka ay qiimaha ka hoosayso gado ‘buy’ marka ay ka korraysana iska gad ‘sell’.

Waxaa jira saddex nooc oo moving average ah waana:

1. Simple moving average (SMA)
2. Weighted moving average (WMA)
3. Exponential moving average (EMA)

Saddexaan jaad ee MA wax badan kuma kala duwana oo waa iska agdhawyihiin ujeedada loo adeegsadana waa in lagu kala ogaado isbedelka qiime ee dhacaya.

Waxaa jira qaab kale oo MA loo sadeegsado, markaanse waa 2 MA oo kalku u kala duwan yahay (different period). Sida sawirka hoose ka muuqata.



Marka la wadareeyo ama la isku lammaansho 2 MA oo xilli kala duwan ah waxaa la fiirshaa marka ay isgooyaan. Marka kan kalka yar uu ka kor maro kan kalka weyn waa calaamad ‘buy’ ah marka kan kalka weyn uu kor maro kan kalka yarina hoos marana waa calaamad ‘sell’.
Si kalana waa la yeeli karaa oo labadooda waxaa loo yeeli karaa laba midab oo kala duwan, badanaa kan kalka yar waxaa laga dhigaa buluug ama cagaar kan kalka weyna waxaa loo mariyaa midab guduud/casaan ah. Sidaas darteed marka kan guduudan kor maro waa ‘sell’ marka kan cagaaran ama buulugu kor marana waa ‘buy’. Xilliga ugu habboon ee la geli karo waa marka ay isgooyaan.

RELATIVE STRENGH INDEX (RSI)



Tusiyaha RSI waa mid ka mida kuwa ugu muhiimsan tusiyeyaasha oo dhan. Waa tusiyaha kaliya ee 90% saxnaanshihiisa la isku hallayn karo. Tusiyahaan waxaa uu cabbiraa xaaladda gadasho ama iska gadid ee lacagta isagoo markii aad loo gado ee ay tahay in la celiyo ama aad loo gato ee ay tahay in la celiyaba tilmaama, amase wuxuu tilmaamaa xilliga ay tahay in qiimaha dib loo saxo (price correction). Cabbirka tusiyehaan wadartiisu waa 100 hayeeshee waxaa uu boqolkaas u kala qaybiiyaa 4 qaybood oo kala ah 0, 30, 70 iyo 100.



Waxaa uu ka kooban yahay 2 qaybood oo muhiim ah oo kala ah:

1. Overbought (aad loo gado): marka xarriiqdu ka kor marto tirada 70 ee ay u dhaxayso 70 iyo 100 ayaa la yiraahdaa overbought, markaas oo kalana dib ayaa loo celiyaa oo hoos baa loo dhigaa.
2. Oversold (aad loo gato): marka xarriiqdu ka hoos marto tirada 30 ee ay u dhaxayso 30 iyo 0 ayaa la yiraahdaa oversold, markaas oo kalan dib ayaa loo celiyaa oo kor baa loo qaadaa.

Marka qiimuhu aad kor ugu kaco ee ay tahay in hoos loo celiyo si la isugu dheellitiro qiimayaasha RSI-gu wuxuu muujiyaa xaalad overbought ah taasoo indhahaagu arki karaan kuuna sahlyasa go'aan qaadashada in aad 'sell' tiraahdid.

Si taas ka soo horjeedda marka qiimuhu aad hoos ugu dhaco ee ay tahay in kor loo qaado si la isugu dheellitiro qiimayaasha RSI-gu wuxuu muujiyaa xaalad oversold ah taasoo isla sidii oo kale kuu fududaynaysa inaad 'buy' tiraahdid.

Badanaa qiimuhu waxaa uu ku dhex wareegaa labada tiro ee 30 iyo 70 oo way adag tahay in uu kor u dhaafo hayeeshee markii uu kor u dhaafo 70ka ama uu hoos uga dhaco 30 dib ayaa loo celiyaa waana tan markhaatiga ka ah inaan sell ama buy xilliyadaas oo kale ku beegno.

MOVING AVERAGE CONVERGING DIVERGING (MACD)



Tusiyehaani wax saas ah kagama duwana kii aan ka soo hadalnay MA. Waa isla iyagii oo labo ah oo meeshii kii hore chart-ka raacayey kan sida RSI ayuu hoos ka muuqdaa isaga oo ay wehliyaan cabbirka mugga qiimaha (price volume). Haddii si kale loo dhigo waa 2 MA oo la isku lammaanshay kalkuna u kala duwan yahay.

Qaabka adeegsiga tusiyehaan waa marka ay is gooyaan labada xarriiqood. Marka kan kalka yari ka kor maro kan kalka weyn waa calaamad ‘buy’ marka kan kalka weyni ka kor maro kan kalka yarina waa calaamad ‘sell’. Haddii aad midabyo u yeesho oo marka kan cas kor maro aad ‘sell’ tiraahdo marka kan cagaarka ahi kor marana aad ‘buy’ tiraahdo iyana waa si wanaagsan.

FIBONACCI RETRACEMENT

Waa qalab cabbira dib u noqoshada qiimaha markii lagu samaynayo sixitaan. Marka qiimuhu meel aado kor iyo hoos kay doontaba ha noqotee, toos isagama uu socdee marna hoos ayuu soo jalleecaa marna kor isaga oo celcelis ahaan jiho u socda. Sidan oo kale:



Haddii aan eegno qiimaha inta fallaaruhu ku uujisan yihiin waxaa uu ka soo bilowday 1265.17 waxaana uu gaaray 1214.30. markii laga soo tago kororka qiimaha intii uu sii socday ee uu jarayey masaafada labada qiime ee aan sheegnay waxaa uu sameeyey dhawr jeer oo noqosho ah (u fiirso fallaaraha qiimaha la socda). Isaga oo celcelis ahaan kor u socda ayuu dhawr jeer noqday waana taas midda lagu cabbiro aaladda Fibonacci retracement.



fibonacci retracement waxaa uu ka kooban yahay dhawr heer oo kala ah (1, 0.78, 0.61, 0.5, 0.38, 0.23 iyo 0). Mid walba oo ka mida tirooyinkan wuxuu u taagan yahay boqolley oo hadda jajab ayey u qoran tahay waana sidan (100%, 78%, 61%, 50%, 38%, 23% iyo 0%). Markii qiimuhu dhaco ama kaco wuxuu ku noqdaa heerarkaas mid ka mida waxaana ugu caansan 38% iyo 50% oo badanaa labadaas heer ayuu gaaraa. Haddii aan eegno isla sawirka sare waxaan arki karnaa in qiimuhu markii uu soo dhacay kadib uu ku soo laabtay heerka 38% ka dibna uu dhicitaankiisii sii watay.

Qalabkan Fibonacci retracement waxaa uu inaga caawiyaa in aan ku qiyaasno meesha qiimuhu gaari karo markii uu jiho u dhaqaaqo oo waxaa looga go'aan qaataa faa'iido qaadashada iyo qasaare joojintaba.

CUTUBKA: 8

DAREENKA NAFEED IYO TALOOYIN

DAREENKA NAFEED (PSYCHOLOGICAL FEELING)

Mawduucaan aad ayuu cajiib u yahay oo waa mid xaasaasi ah, waxaadna mooddaa in uu isagu aad uga sii muhiimsan yahay adeegsiga qalabkii aynu kor uga soo sheekaynay.

Marka ugu horraysa ee qofku FOREX maqlo badanaa qaabka ay ku soo gaarto laablakac iyo dareen degdeg ah iyo halmar taajir ayuu ku soo gaaraa taasoo sababta in uu si kedis ah isku yiraahdo lacagtaas meesha daadsan wax ka soo guro. Durba inta uu fahmo sida MT4 loo adeegsado oo uu 2 maalmood Demo ciyaaro oo ay dhawr jeer u gasho ayuu inta laabta ka qoslo iskula sheekaystaa "bes weeye taajirtay" ee lacagta run u bedel. Isagoo isa sii oranaya "Alla waxaan haddii ay hadda lacag caadiya ahaan lahayd ma sidaas ayaan uga dhaansan lahaa?" maalmo gudahood ayuu degdeg dullaal lacag uga dhaamiyaa dabadeedna labadii batoon ee 'buy' iyo 'sell' ee uu fahmay ayuu ku boobaa lot-kana u badiyaa si uu isla maanta u hodmo.

Markii uu lacag dhab ah ku shubto ee uu labadii batoon boobsiiyo ayuu isla goorta uu furo wuxuu arkaa qasaare ku socda! Markaas ayuu welwel u bilowdaa.
Wuxuu arkaa lacagtii oo ka sii gurmaysa marba marka ka dambaysa, markaas ayuu isweydiiyaa "see wax yihiin?" soo anigii markii demo-ga la joogay bahasha ka gurayey. Wuxuu waqti badan la qaataa shaashadda mobile-kiisa oo uu hawl walba oo u taalley ku baajiyaa, waxaa dareenkiisa bedelaya guduudka iyo buluugga isaga oo daqiiqadana faraxsan daqiiqadaha xigana murugaysan. Wuxuu mararka qaar hurdada

ka toosayaa saq dhexe ee habeenimo isaga oo eegaya meesha xaalkoodu marayo dalabyadii u furnaa.
Waxaa uu furayaa dalab oo faraha ayuu ka qaadayaa xitaa haddii uu qasaare isdaba joog ah ku hayo isaga oo rajo ka qaba in uu soo laabto. Waxaa sidoo kale uu xirayaa dalabkii xoogaa yar oo faa'iido ah uu ka qabto isaga oo isleh kala bax inta uusan kaala laaban. Markaas ayaa waxaa soo haraya qasaare waaweyn iyo faa'iido yaryara, taasoo keenaysa in akoonku burburo.

Mar walba oo uu akoon ka burburo wuxuu furaa mid kale isagoo isleh wixii aad markii hore khaladay hadda ha khaldin ee ka digtoonow. Hayeeshee khaladaad kale ayuu galaa oo keenta in ay sidii oo kale dhacdo oo uu kanna faaruqo.
Intaas markii ay u marayso ayuu is yiraahdaa sidaani si maahane raadi cid aad akoonka u dhiibatid oo kuugu shaqaysa. Wuxuu khadka ka baaraa dad la yiraahdo koonto maamulayaal (account managers) wuxuuna ka codsadaa in akoonka loo maamulo iyaguna waa ka aqbalaan illeen waa shaqadoodee. Kuwii uu akoonka u dhiibtay waxay ku shaqeeyaan akoonkii iyaga oo u adeegsada lot aad u weyn akoonkuna uusan xamili Karin. Sababta ay sidaas u samaynayaan ayaa ah in akoonkaaga khamaar lagu cayaaro oo haddii la guulaysatana faa'iidada lagula qaybsado haddii la qasaarana "waanu ka xunahay' lagu yiraahdo.
Sida caadiga ah akoonada noocaan oo kale loogu shaqeeyo maalmo ka dib waa ay burburaan maxaa yeelay in akoonkaagu marto waxay ku xiran tahay in suuqu halmar dhinaca kale aado oo awalba illeen xarashaw madax bay ahayde ay dhinaca kale u dhacdo.

Markii dhawr akoon sidaan kaga gubtaan ayuu raadiyaa signals iib ah. Markii uu signals-ka helo ayuu galiyaa MT4-kiisa si aan tashiil lahayn oo wuxuu is yiraahdaa khabiirro ayaa soo diray mana khaldamayaane wax fiican ka dhifso. Intaa dabadeed waxaa dhacda in markii uu qiimuhu dhinaca qasaaraha xoogaa yar u dhaqaaqo uu welwel ku bilowdo oo uu haaraan iyo aflagaado u saaro signal bixiyihii.
Markaas ayuu bilaabaa in uu si fiican u barto suuqa oo uu khatarta maaraynteeda awoodda saaro ama uu gabigiisba isaga baxo.

Markii aad suuqaan ka ganacsanaysid waxaa muhiima inaad runta awoodda saartid taasoo ah in sida faa'iido u jirto ay khasaarana u jirto oo mar kasta oo aad dalab furtid khasaaraha ku tashatid. Waxaa muhiima in aad qorshe ka leedahay markii qasaare dhaco oo aad labo arrimoodba ka taxadartid; waa mide in aad lotka iska yaraysid intaad awooddid, waa tan labaade inaad qasaari joojin leedahay (stop loss). Inta aad lot-kaaga ka dhigaysid waxay ku xiran tahay boqolleyda aad ku talagashay haddii qasaare dhaco in ay kaa go'do. Ma 1%, 2% ama ka yar ama ka badan ayaad ogoshahay in ay markiiba kaa go'do. Hadda waxaad samaysatay sl iyo tp oo waad taqaan haddii qasaare dhaco inta kaa go'i karta haddii faa'iido dhacdana inta aad faa'iidi doontid. Haddii aadan sidaas yeelin oo aad samaysid wixii akoonada hore kaa gubay waad qamaaraysaa qamaarkuna waa reebban yahay Islaamka dhexdiisa.
Mar haddii aad lot yar isticmaashay oo aad akoonkii dhaqaalaysay kuna xisaabtamaysid sidii dukaan caadiya oo kale inaad marba lacag yar faa'iido ama lacag yar qasaarto, ma jiri

doonto wax welwel ah oo ku hayn doona, mana jiri doonto inaad sidii hore oo kale aad shaashadda waqti badan la qaadatid.
Mar kaste waxaa la isticmaalaa qaacidada ah “faa’iido wax kaama tartee ha qasaarin”. Taasoo keenaysa in haddii aad qasaarto oo aad wax yar qasaartid aad fursado dambe u heli doontid inaad saxdidi wxii khaldamay.
Ha ku xisaabtamin wax la yiraahdo maalin ama bil taajir waayo taasi run maaha ee waa baqtiyaanasiib isaguna waa baab gooniya. U xisaabtan sidii ganacsi caadiya oo aad bilawday koritaana kaa raba iyo inaad dhaqaalayso.

ADEEGYO CID KALE KUU QABAN KARTO.

Mar haddii ay waqti qaadanayso in qofku ogaado, barto, fahmo, la keeno kana shaqaysto suuqaan, oo ay waqti iyo lacag badanba ka galayso lacagtaasi ha ahaato mid uu barashadiisa ku bixiyo ama mid uga luntaba e, waxaa muhiima inaad baartid dad kuu qaban kara adeegyada ka ganacsiga suuqan.
Adeegyadaas waxay noqon karaan Signals. Signals-ku waa warbixin ku saabsan lacag cayiman oo xogteeda laguu soo diray oo kaliya aad adigu galinaysid MT4-kaaga, taaso sababaysa in aad qabatid faa’iidadii uu qabtay qofkii kuu soo diray qofkaas oo ah mid aad horay uga soo fiirsatay.
Waxaa ka mida adeegyada in qof aad sidoo kale ka soo fiirsatay aad u dhiibatid lacag caddaan ah oo uu kuugu shaqeeyo ama aad u dhiibatid akoon lacag ku jirto oo uu inta Copy trade isticmaalo uu kuugu shaqeeyo akoonkaaga.

Waxaa markaas kuu suuragalaysa in adiga oo barashada suuqa gees kaga jira aad geeska kalana kaga jirtid ka shaqaysigiisa iyo inaad faa'iido joogto ah ka qabatidba.
Waxaad mar walba ka digtoonaataa inaad akoonkaaga galisid signals aadan garanayn cidda iska leh iyo cidda soo dirtayba, ka digtoonow inaad akoonkaaga u dhiibatid cid aadan aqoon u lahayn, sidoo kalana ka digtoonow inaad lacag u dirtid dad aadan aqoon, intay kula soo wadaagaan sawirro lacag ah yeysan iimaanka kaa soo ridin.

TIXRAAC

1. Answers yahoo
2. Babypips.com
3. Images.yahoo.com
4. Mt4 tutorials
5. Tradingview.com
6. Finfiz.om
7. Investing.com
8. Finance illustrated

Dhammaad